Xuquuqaha Waalidka ee Waxbarashada Gaarka ah Ogeysiiska Dhowritaannada Nidaameed

Dhaqangalkeedu Yahay: Ogast 2009
Dib loogu noqday: Noofambar 2009

Sharciga Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafanimada leh (IDEA), oo ah sharciga Federaalka ah ee khuseeya waxbarashada ardayda naafanimada leh, ayaa uga baahan in dugsiyadu siiyaan waalidika ilmaha naafanimada leh ogeysiis wata faahfaahin buuxda oo ah dhowritaannada nidaameed ee laga helo hoosteeda IDEA iyo Waaxda Waxbarashada Vermont iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah (Dhammaan tixraacyada Sharciyada waxa laga heli karaa Buugga Xeerarka iyo Ku-Dhaqmmada ee Guddig Waxbarashada Gobolka Vermont, tixraaca 34 CFR wax alga heli karaa Diiwaanka Federaalka).

Nuqul ogeysiiskan ah waa in la siiyaa waalidiinta ama ardayda qaan-gaarka ah mar kaliya sannad dugsiyeedka, laga reebo markay waajibka tahay in nuqul waalidiinta ama ardayda qaan-gaarka marka:

1. U-diritaanka hore ee qiimaynta;

2. Helitaanka kowaad ee cabasho maamuleed ee hoos timaad Xeerka 2365.1.5 ama cabashada habraaca cadaaladeed leh ee hoos timaad Xeerka 2365.1.6 ee sannad dugsiyeedkaas.

3. Weydiisi waalid ama ardayda qaan-gaar ah; iyo

4. Iyada oo la raacayo nidaamyada edbinta ee Xeerka 4313.1(h).

VERMONT
DEPARTMENT OF EDUCATION

Qaybta Gacan-Qabashada Ardayga
(802) 828-5114

TABLE OF CONTENTS

OGEYSIIKA HORE EE QORAN 5

OGEYSIIS 5
OGEYSIISKU WAXA U KA KOOBAN YAHAY 5
OGEYSIIS LAGU BIXIYO LUQAD LA FAHMI KARO 6

LUQADDA HOOYO 6

WARAAQAHA LAGU DIRO HABKA ELEKTIROONIGGA AH 6

QEEXITAANKA OGGOLAANSHAHA 7
OGGOLAANSHAHA QIIMAYNTA HORE 7
OGGOLAANSHAHA WAALIDKA EE ADEEGYADA 8
LA-NOQOSHADA OGGOLAANSHAHA WAALID EE ADEEGYADA 8
OGGOLAANSHAHA WAALIDKA EE LOOGU TALAGALAY DIB-U-QIIMAYNTA 9
DIIWAANGALIN LAGU CADDEYNAYO IN LA SAMEEYEY DADAAL MACQUUL AH OO LAGU RAADINAYO OGGOLAANSHAHA WAALIDKA 9
SHURUUDAHA KALE EE OGGOLAANSHAHA 9

QIIMAYNTA WAXBARASHADA EE MADAXA-BANNAAN 11

QEEXMOOYIN 11
XAQA WAALIDKU U LEEYAHAY QIIMAYNTA KHARASHKEEDA DAWLADDU AY BIXISO 11
QIIMAYNTA U WAALIDKA BILAABAY 12
CODSIYADA QIIMAYNETA EE SARAAKIISHA DHAGEYSIGA 12
SHURUUDAHA DEGMADA DUGSI/ URURKA MAARAYNTA 12

XOG-DHOWRKA MACLUUMAAD IYO DIIWAANNADA ARDAYDA 13

QEEXMOOYIN 13
OGEYSIISKA WAALIDIINTA 13
XUQUUQDA MARIN-U-HELKA XOGTA 14
DIIWAANKA MARIN-U-HELKA 15
DIIWAANNADA LAGA HAYO ILMAHA HAL KUWA KA BADAN 15
LIISKA NOOCACA IYO GOOBAHA MACLUUMAADKA 15
AJUURADA 15
WAX KA BEDDELKA DIIWAANNADA WAXA KU QORAN MARKUU WAALIDKU CODSADO 15
FURSADDA LOOGU TALAGALAY DHAGEYSIGA 16
NATIIJADA DHAGEYSIGA 16
OGGOLAANSHO DAAH-UGA-QAADKA MACLUUMAADKA SHAQSIGA LAGU GARAN KARO 17
DHOWRITAANNADA 17
BURBURINTA MACLUUMAADKA 18

QAABSOCODYADA MAAMMULEED EE CABASHADA 19

WAXAY KU KALA DUWAN YIHIIN HABRAACA DHAGESIGA EE CABASHADA IYO QAABSOCODYADA MAAMMULEED EE CABASHADA 19
QAABSOCODYADA MAAMMULEED EE CABASHADA 19

QAABSOCODYADA CABASHADA HABRAAC CADAALADEED LEH 22

HABRAACA CADAALADEED EE CABASHO 22
Guud Ahaan *22*
Macluumaad waalidiinta loogu talagalay *22*
BILOWGA DHAGEYSIGA HABRAAC CADAALADEED LEH 22
Guud Ahaan *22*
Waxa ku jira Cabashada *23*
Ogeysiiska loo baahan yahay kahor cabashada habraac cadaaladeed leh *23*
Kaafi ahaanta (ku filnnaanta) cabasho *23*
Wax-ka-beddelka Cabashada *24*

Jawaabta degmada dugsi ama ururka maarayn tacliin ay ka bixiyaan cabasho habraaca cadaaladeed leh. *24*
Jawaabta dhinaca kale ee ku wajahan cabashada habraaca cadaaladeed leh *24*
DHEXDHEXAADINTA 25
Guud Ahaan *25*
Shuruudaha *25*
Eex-la'aanta Dhexdhexaadiyaha *26*
MEELEYNTA ILMAHA MARKA CABASHADA HABRAACA CADAALADDA IYO DHAGEYSIGA LA SUGAYO 26
SHIRKA ARRIN XALLINTA 27
Kulanka Arrin Xallinta *27*
Muddada Xallinta *28*
Isku Hagaajinta 30ka-maalmood-Taarikheed ee Muddada Xallinta *29*
Heshiiska arrimo-dajinta ee qoran *29*
Muddada Dib-u-Eegidda Heshiiska *29*
DHAGEYSIYADA LOO QABTO CABASHOOYINKA HABRAACA CADAALADEED LEH 29
Dhageysi Nidaam Xuquuq Dhowris Eex-La'aan Ah *29*
Sarkaalka dhageysiga eex-la'aanta ah *30*
Jadwalka Loogu Talagalay Dhageysiga *30*
Waxyaabaha ka Reebban Jadwalka *30*
QAABSOCODYADA DHAGEYSIGA 31
Guud Ahaan *31*
Macluumaad Dheeraad ah oo Daah-uga-Qaadka ku Saabsan *31*
Xuquuqaha Waalid ee Dhageysiyada *31*
GO'AANKA SARKAALKA DHAGEYSIGA 31
Natiijooyinka iyo Go'aanka loogu talagalay Shacabka Guud *32*
RAFCAANNADA 32
Kama-dambayn ahaanta g'aanka dhageysiga *32*
Jadwallada iyo Ku Habboonaanta Dhageysiyada iyo Dib-u-wegyada *32*
DACWO MADANI AH 33
Guud Ahaan *33*
Xaddidka Wakhti *33*
Qaabsocodyada Dheeraadka ah *33*
Maxkamadaha degmada awood hoos-imaadkooda *33*
Micneynta Xeerka *33*
AJUURADA) QAREENKA 34
Guud Ahaan *34*
U Xukunka Ajuurada (fees) *34*

QAABSOCODYADA MARKA CARRUURTA NAAFANIMADA LEH LA EDBINAYO 37

AWOODDA SHAQAALAHA DUGSI 37
U Go'aaminta Kees-ka-Kees *37*
Awoodda Guud *37*
Awoodda Dheeraadka ah *37*
Adeegyada *37*
Astaanta Go'aaminta *38*
Go'aaminta in anshaxu yahay wax ka yimid ama calaamad u ah naafonimada **ilmaha.** *39*
Xaaladaha Gaarka ah *39*
Qeexmooyin *40*
Wargalinta *40*
BEDDELKA MEELEYNTA SABABTEEDU TAHAY KA-KAXAYMO EDBIN 40
U Garashada Goobta *41*
Racfaan *41*
Awoodda Sarkaalka Dhageysiga 41
Dhageysiga Habraaca Cadaaladeed ee La Dedejiyey *42*
Meeleynta Muddada Rafcaannada *42*

DHOWRITAANBADA LOOGU TALAGALAYCARRUURTA AAN WALI AAN U-QALMIN WAXBARASAHDA GAARKA IYO ADEEGYADA LA XIRIIRA 42
Dhowritaannada Guud *42*
Ku Saleynta Ogaanshaha ee Arrimaha Edbinta *43*
Xeerarka lagu dhaqmayo haddii ayna jirin wax lagu saleeyo in arrinta la ogaa *43*
U DIRITAANKA IYO FULINTA FICILKA SHARCI IYO MASU'UULIYIINTA MAXKAMADEED 44
Gudbinta Diiwaannada *44*

SHURUUDAHA MEELEYNTA WAALID AY UGU MEELEEYAAN ARDAYADA DUGSIYADA MADAXABANNAAN IYADA OO DOWLADDU KHARASHKA QABTO 45

SHURUUDAHA GUUD 45
LACAG DIB-UGU-CELINTA LOOGU TALAAGALAY KU MEELEYNTA DUGSIGA MADAXBANNAAN 45
Xaddidka Lacag dib-ugu-celinta *45*

Ogeysiika Hore ee Qoran

Xeerka 2365.1.1

Ogeysiis

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ayaa ah inay adiga ku siiyaan ogeysiis qoran (inay kugu siiyaan macluumaadka qaarkood qoraal ahaan), marka kasta oo:

- La soo jeediyo bilaabitaan ama beddel:
    - garasho,
    - qiimayn,
    - meeleynta waxbarasho ee ilmahaaga, ama
    - siinta waxbarasho dawli ah oo habboon oo lacag la'aan ah (FAPE) ee ilmahaaga; ama
- La diido in la bilaabo ama la beddelo aqoonsiga, qiimeynta, ama meeleynta waxbarashada ilmahaaga ama siinta FAPE ee ilmahaaga.

Ogeysiisku waxa u ka kooban yahay

Ogeysiiska qorani waa:

- Inuu sifeeyaa tallaabada degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ay soo jeedinayaan ama ay diidayaan inay qaadaan;
- Inuu sifeeyaa sababta degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin u soo jeedinayo ama u diidayo inay tallaabada qaadaan;
- Inuu Sifeeyaa qaabsocod kasta oo qiimayn, qiyaasta, diiwaanka, ama warbixinta degmadaadu dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ay u isticmaaleen soo jeedinta ama ay diiditaanka ficilka;
- Inay la socdaan kelmado sheegaya inaad ku leedahay ilaalin hoostooda sharciyada dhowritaannada nidaameed ee ku jira IDEA iyo Xeerarka Waxabarashada Gaarka ah ee Vermont;
- Inuu kuu sheegaa sidii aad ku heli lahayd qeexitaan ku saabsan dhowritaannada nidaameed haddii ficilka degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin ay soo jeediyaan ama diidayaan ayna ahayn u diritaan hore oo qiimayn;
- Inay la socdaan kheyraad aad adigu kula xiriiri lahayd gacan-qabasho fahamka ah IDEA iyo xeerarka waxbarashada gaarka ah ee Vermont;
- Inuu sifeeyo doorashooyin kale oo kasta oo ay qaddariyeen kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiyeysan (IEP) iyo sababaha wax doorashooyinkan loo dhaafay; iyo
- Inuu bixiyo sifeyn sheegaya sababaha kale ee degmadaadu dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ay u soo jeediyeen ama ku diideen ficilka.

Ogeysiis lagu bixiyo luqad la fahmi karo

Ogeysiisku waa inuu noqdaa:

- Mid ku qoran luqad ay fahmi karaan dadweynaha guud; iyo
- Mid lagugu siiyay luqadda afkaaga hooyo ama hab kale oo lagu wada xiriiro, laga reebo markay iska caddahay ineyna suurtagal ahayn in sidaas la sameeyo.
    - Haddii ay luuqadaada ama habka kale ee lagu wada xiriiro aanu ahayn mid qoran, waa in degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin hubisaa in:
        - Ogeysiinta laguugu turjumo hadal qaab kale ahaan adiga luqaddaada hooyo ama hab kale oo la isku af garto;
        - Inaad fahmi karto waxa ku jira ogeysiinta; iyo
        - Inay jiraan caddayn qoran oo ah in la oofiyey 1 iyo 2.

Luqadda Hooyo

34 CFR §300.29

Luqadda hooyo, marka loo isticmaalo shaqsi leh karatida aqoonta Ingiriisiga oo xaddidan, micnaheedu waa sida soo socota:

- Luqadda sida caadiga ah u qofkaasi u isticmaalo, ama, markay tahay ilmaha, luqadda sida caadiga ah waalidiinta ilmuhu ay u isticmaalaan;
- Dhammaanba wixii toos ula-xiriirka ah ilmaha (oo ay ku jirto qiimaynta ilmaha) luqadda sida caadiga ah uu ugu isticmaalo ilmuhu marka u guriga ama jawi waxbarasho u joogo.
- Qofka dhagoolanimada ama indhala'aantu hayso, ama qofka aan luqadda uu ku hadlaa aaney qorneyn, habka kale ee uu dadka kale kula xiriiri karo oo ah midka uu caadi ahaan isticmaalo (sida luqadda ay isticmaalaan dadka aan dhagaha wax ka maqal, farta ay akhriyi karaan dadka aan indhaha wax ka arag (Barille), ama af ahaan ku wada hadalkaba).

Waraaqaha Lagu Diro Habka Elektiroonigga ah

Xeerka 2365.1.1(h) (4)

Haddii degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin u fidiyaan waalidiinta wax kala doorasho ah inay ku helaan dukumentiyada e-mailka, waxaad dooran kartaa inaad ku heshid waxyaabaha soo socda e-mailka:

- Ogeysiika hore ee qoran;
- Ogeysiiska dhowritaanka qaabsocod; iyo
- Ogeysiiska la xiriira cabashada habraac cadaaladeed leh.

Oggolaanshaha Waalid

Xeerka 2365.1.3

Qeexitaanka Oggolaanshaha

Oggolaanshaha micnahiisu waa:

- Adiga in si buuxda afkaaga hooyo laguugu wargaliyey ama qaab kale oo wada xiriir (ee ay ka midka yihiin luqadda calaamadaha, Braille, ama afka ka hadalkaba) dhammaan macluumaadka ku saabsan waxqabadka adigu oggolaanshaha aad u siineyso.
- Inaad fahansantahay kuna raacsan tahay tallaabadaasi iyada oo qoraal ah ficilkaasi ah, iyo oggolaansho sifeynaya tallaabadaasi iyo liistooyin ah qoraalka oo diiwaansan (haddii ay jiraan) kaasi oo loo siideyn doono iyo qofka ay ku socoto; iyo
- Inaad fahansantahay in oggolaanshuhu ikhtiyaari ka yahay dhinacaaga oo aad ka noqon karto oggolaanshahaaga wakhti kasta.
- Ka noqoshadaada oggolaansho ma burineyso (tirtireyso) ficilka dhacay kadib markaad bixisay oggolaanshahaaga iyo inta aanad ka noqon oggolaanshahaaga.

Oggolaanshaha Qiimaynta Hore

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ayaan samayn karin qiimaynta hore ee ilmahaaga sidii ay u go'aamiyaan inuu ilmahaagu u qalmo iyo in kale markay hoos timaad IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ee Vermont iyaga oon marka hore :

- Aan ku siin ogeysiis hore oo qoran oo ku saabsan ficilka la soo jeedinayo iyo
- Aan kaa helin oggolaansho sida lagu qeexay hoosteeda cinwaanka Oggolaanshaha Waalidka.

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ayaa waajib ah inay inay dadaal macquul ah u galaan sidii ay u heli lahaayeen oggolaansho warqab ah oo loogu talagalay in la go'aamiyo inuu ilmahaagu yahay ilmo leh naafanimo iyo in kale.

Oggolaanshahaaga qiimaynta hore markaad bixiso, ma aha micnaheedu inaad siineysid waliba oggolaanshaaga degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin inay u bilowdo ilmahaaga waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira.

Haddii u ilmahaagu wax ka barto dugsiyada dowladda ama aad raadineyso inaad qorto dugsiyada dowladda ilmahaaga oo aad diidday inaad bixiso oggolaanshaha ama aanad ka soo jawaabin codsiga oggolaanshaha ee bilowga qiimaynta, laga yaabaa inay degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin, laakiin iyada oon waajibaad ku ahayn:

- Inay ku sii wadaan qiimaynta iyaga oo raadinaya dhexdhexaadin {XE "oggolaansha: diidmada, qiimaynta, habraac cadaaladeed/dhexdhexaadin" iyaga oo isticmaalaya habraac cadaaladeed ama dib-u-eeg xogta jirta.

- Go'aamiyaan ineyna ku sii wadin qiimaynta oo waxay diiwaangalin doonaan sababaha ay sidaa ugu sameeyeen diiwaanka ilmaha.
    - Degmadaa dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin kuma xadgudbayaan waajibaadkooda inay soo helaan, ogaadaan iyo inay qiimeyaan ilmahaaga haddii ayna ku sii wadin qiimeynta ilmahaaga marka lagu jiro xaaladahan.

Oggolaanshaha waalidka ee adeegyada

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin waa waajib inay helaan ma dadaal macquul ah lagu muujiyo iny helaan oggolaanshahaaga warqabka ah ka hor inta aan la siin adeegyada waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ilmahaaga markay ugu horreysa.

Haddii aadan ka jawaabin codsiga lagugu soo weydiiyey oggolaanshahaaga inaad bixiso si ilmahaagu u helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira marka ugu horreysa, ama haddii aad diiddo inaad siiso ogolaanshahan oo kale, degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin lagama yaabo inay isticmaalaan dhexdhexaadin, cabasho habraac cadaaladda, kulanka xallinta ama dhageysi habraac cadaaladda eex-la'aan ah leh.

Haddii aad diido ama aadan ka jawaabin codsiga lagugu soo weydiiyey oggolaanshahaaga inaad bixiso si ilmahaagu u helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira marka ugu horreysa, ama aadan weydiisi ah oggolaanshahan oo kale ah, oo ay degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ayaa siin ilmahaaga waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee u raadiinayeen oggolaanshaaga, degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ayaanan:

- Ku xadgudbin ka filitaanka in ilmahaaga loo diyaariyo waxbarasho dawli lacag la'aan ku habboon ah (FAPE) sababta oo ah ilmahaaga oo aan la siin waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira; iyo
- loo baahnayn in la yeesho kulan ah barnaamijka waxbarashada shaqsiyeysan (IEP) ama in loo soo saaro ilmahaaga barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah (IEP) iyo adeegyada la xiriira ee oggolaanshahaaga laguu weydiistey.

La-Noqoshada Oggolaanshaha Waalid ee Adeegyada

Waxaad xaq u leedahay adigu inaad soo ceshato (la noqoto) oggolaanshahaaga adeegyada waxbarashada gaarka ah wakhti kasta oo ah kahor ama wax ka dambeeya bilowga adeegyada.

Haddii aad sidaas sameyso, degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ayaa laga yaabaa weydiisan doonin dhexdhexaadin ama dhageysi habraac cadaaladeedleh.

Waxa kale oon ilmahaaga lagu ilaalin doonin markaay tahay edbinta hoos timaad xeerarka waxbarashada gaarka ah.

Haddii aad ka noqoto oggolaanshaha, ilmahaaga ayaa wali lagaga ilaalin doonaa kala-qoqobka hoostiisa ah sharciga Qaybta 504.

Waxaad weydiisan kartaa adigu in dugsigu qaddariyo wixii waafajin ah ee ilmahaagu ugu qalmo hoostiisa ah sharciga Qaybta 504.

Oggolaanshaha waalidka ee loogu talagalay dib-u-qiimaynta

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ayey waajib ku tahay inay ka heelaan oggolaansho warqab ah inteyna dib-u-qiimayn ilmahaaga, haddii degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ay muujin karto mooye:

- Inay ku kacday tallaabooyin macquul ah si loo helo ogolaanshahaaga dib-u-qiimeynta ilmahaaga; iyo
- Inaadan adigu ka soo jawaabin.

Haddii u ilmahaagu wax ka barto dugsiyada dowladda ama aad raadineyso inaad qorto dugsiyada dowladda ilmahaaga oo aad diidday inaad bixiso oggolaanshaha ama aanad ka soo jawaabin codsiga oggolaanshaha ee bilowga qiimeynta, laga yaabaa inay degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin sameeyaan, laakiin kuma aha waajibaad:

- Inay ku sii wadaan qiimaynta iyaga oo raadinaya dhexdhexaadin {XE "oggolaansha: diidmada, qiimaynta, habraac cadaaladda/dhexdhexaadin" iyaga oo isticmaalaya habraac cadaaladda ama dib-u-eeg xogta jirta.
- Go'aamiyaan inayna ku sii wadin qiimaynta oo waxay diiwaangalin doonaan qiilka (sababaha) ay sidaa ugu sameeyeen diiwaanka ilmaha.

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin kuma xadgudbayaan waajibaadkooda inay soo helaan, ogaadaan iyo inay qiimeyaan ilmahaaga haddii ayna ku sii wadin qiimeynta ilmahaaga marka lagu jiro xaaladahan.

Diiwaangalin lagu caddeynayo in la sameeyey dadaal macquul ah oo lagu raadinayo oggolaanshaha waalidka

Dugsigaagu waa inuu hayaa diiwaangalin caddeynaya in la sameeyey dadaal macquul ah oo lagu raadinayo oggolaanshahaaga waalidnimo ee qiimeynta hore, si loo siiyo waxbarashada gaarka ah ama adeegyada la xiriira marka ugu horreysa, si dib loogu qiimeeyo iyo in la helo waalidka ilmaha dawladdu gacanta ay ku hayso ee ah bilowga qiimeynta loo rabo. Diiwaangalinta waa in ay la socotaa qoraal sheegaya iskudayga degmadaaada iyo ururkaaga maaraynta tacliin ee ay ka sameeyeen arrimahan, kana midka yihiin:

- Diiwaan ku-qor xog faahfaahsan oo ku saabsan talefoonnada la wacay ama la isku dayey iyo wicitaannadaasi waxay ku dambeeyeen;
- Nuqullo ah waraaqihii lagu wada xiriirey ee adiga laguu soo diray iyo wixii jawaabo ee la helay; iyo
- Diiwaan qor xog faahfaahsan oo ah wixii booqashooyin gurigaaga ama goobta shaqadaada lagu sameeyey iyo natiijooyinka booqashooyinkaas.

Shuruudaha kale ee oggolaanshaha

Oggolaanshahaaga looma baahana ka hor inta ayna degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin:

- Dib-u-eegin wixii xog ee jirta ee ka mid ah qiimeynta ilmahaaga ama dib-u-qiimeynta; ama
- Ka qaaditaanka baaritaan ilmahaaga ama qiimeynta kale ee laga qaado dhammaanba carruurta haddii, ka hor baaritaankaas ama qiimeyntaas, ay oggolaansho looga baahan yahay waalidiinta dhammaan carruurtaas mooyee.

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin lagama yaabo inay u isticmaalaan diidmadaada inaad oggolaansho u bixiso adeeg ama waxqabad kali ah inay kuugu diidaan adiga ama ilmahaaga adeeg, waxtar ama waxqabad kasta oo kale.

Adigu haddii aad:

- ilmahaaga qoraty dugsi madax-bannaan adiga oo kharashaga bixiya, ama
- Guriga aad wax ugu dhigto ilmahaaga, iyo
- bixin weydo oggolaansho lagu siiyo ilmahaaga qiimaynta hore ama dib-u-qiimaynta hore ilmahaaga, ama
- aanan ka jawaabin codsiga lagugu weydiisanayo oggolaanshaha,

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ayaa ah inayna u isticmaalin dhexdhexaadinta, habraac cadaaladeed leh ee cabshada, kulanka xallinta, ama dhageysi habraac cadaaladeed leh oo eex-la'aan ah inay khasab ku helaan oggolaanshahaaga oo loogama baahna in loo qaddariyo ilmahaga inuu u qalmo si u helo adeegyada xaqnimada leh (adeegyada loo fidiyo carruurta naafanimada leh ee dugsiga madaxabannaan dhigata ee waalidkood la jooga).

Qiimaynta Waxbarashada ee Madaxa-Bannaan

Xeerka 2362.2.7

Qeexmooyin

Sida hoosta lagu sifeeyay, waxaad xuquuq u leedahay inaad u hesho ilmahaaga qiimeynta waxbarashada madaxa-bannaan (IEE) ee ilmahaaga haddii aanad ku raacin qiimaynta ilmahaaga ee ay sameysay degmadaaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin.

Haddii aad weydiisato qiimeynta waxbarashada madaxa-bannaan (IEE), degmadaaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin waa inay ku siiyaan macluumaad ku saabsan meeshaa aad ka heli lahayd IEE iyo shuruudaha degmadaaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ee khuseeya degmadaaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin IEE-yada.

Qiimaynta waxbarasho oo madaxabannaan (IEE) micnaheedu waa qiimayn u qaado imtixaan-qaade khibrad leh oo aan ka shaqayn degmadaaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ee ka mas'uulka ah waxbarashada ilmahahaaga.

Kharashka dawladduu micnaheedu waa degmadaaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ayaa kharashka qiimaynta oo buuxa bixin ama hubin in qiimeynta hase yeeshe lagugu siiyo kharash iyada oon adiga kharsh kaa bixin .

Xaqa waalidku u leeyahay qiimaynta kharashkeeda dawladdu ay bixiso

Adigu waxaad xaq u leedahay qiimayn waxbarasho madax-bannaan oo ilmahaaga ah loona adeegsado kharashka dawladda, haddii aanad ku raacin qiimaynta ilmahaaga degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ku sameeyeen, iyada oo ku xiran xaaladaha soo socda:

- Haddii aad u codsato ilmahaaga qiimayn waxbarasho oo madax- bannaan oo dawladdu kharashka qabto waa inay degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin uu , si aan dib-u-dhac lahayn, midkood:
    - Weydiistaan dhageysi inay ku tusaan in qiimaynta ilmahaagu habboon tahay; ama
    - Qiimayn madaxabannaan oo ilmahaagu la siiyo oo lacag la'aan ah.
- Haddii degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin weydiisato dhageysi oo go'aanka ugu dambeeyaa yahay in qiimaynta degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ee ilmahaagu habboon yahay , adigu waxaad xaq u leedahay qiimayn waxbarasho madaxbannaan, lakiin aan ku kicin kharash dawlo.
- Haddii aad weydiisato qiimayn waxbarasho madaxbannaan oo ilmahaaga ah, degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ayaa ku weydiin kara waxay sababta aad u diiddan tahay qiimaynta ilmahaaga ee soo heshay degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin.
    - Hase yeeshe, degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin lagama yaabo inay kaaga baahato faahfaahin oo lagama yaabo iney si aan

macquul ahayn ay dib ugu dhigto, midkoodna iney ku siiyaan qiimayn waxbarasho madaxbannaan ilmahaaga iyadoo la isticmaayo kharashka dawladda ama markaad buuxiso cabasho habraac cadaaladeed leh si loo difaaco qiimeynta ilmahaaga ee ay sameysey degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin.

Adigu waxaad xaq u leedahay kailya hal qiimayn waxbarasho madaxbannaan oo ilmahaaga ah loona adeegsado kharashka dawladda wakhtigii kasta ee degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ay ku sameyso qiimayn ilmahaaga oo markaa ku raacsanayn.

Qiimaynta u waalidka bilaabay

Haddii aad u hesho ilmahaaga qiimayn waxbarasho oo madax-bannaan iyada oo dawladdu kharashka bixiso ama adigu aad la wadaagto degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin qiimayn lagu sameeyay ilmahaaga oo aad ku heshay kharash gaaar ah

- Degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin ayaa ah inay qaddariyaan natiijooyinka qiimaynta ilmahaaga, haddii ay la kulanto shuruudaha degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ay ugu talagaleen qiimaynta waxbarashada madaxabannaan, go'aan kasta oo lagu sameeyo iyada la tixgalinayo siinta waxbarasho dawli lacag la'aan ah oo habboon (FAPE) ilmahaaga; iyo
- Adiga iyo degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ayaa u dhiibi kara qiimaynta caddayn ahaan habraaca cadaaladda oleh ee dhageysiga kuna saabsan ilmahaaga.

Codsiyada qiimayneta ee saraakiisha dhageysiga

Haddii u saraaal dhageysi codsado qiimayn waxbarasho madax-bannaan oo ilmahaaga iyada ka mid ah habraaca cadaaladda ee dhageysiga, kharashka qiimeynta waa inay dowladdu bixisaa.

Shuruudaha Degmada Dugsi/ Ururka Maaraynta

Haddii qiimaynta waxbarasho madax-bannaani tahay kharashka dowladeed miday ku baxday, shuruudaha hoosteeda lagu helo qiimeynta, oo ay ku jiraan goobta qiimeynta iyo khibradda imtixaan qaadaha, waa iney la mid noqotaa shuruudaha degmadaada dugsi ama ururka go'aamintu ay u isticmaalaan marka ay bilaabaan qiimeynta.

Laga reebo sida lagu sifeeyey korka, degmo dusgi ama ururka go'aaminta ma aha inay soo rogaan xujooyin ama jadawallo la xiriira sidii loo heli lahaa qiimaynta waxbarasho madax-bannaani tahay kharashka dowladeed miday ku baxday

Xog-dhowrka Macluumaad iyo Diiwaannada Ardayda

Qeexmooyin

Xeerka 2365.2

Sida loo isticmaalay cinwaanka Xog-dhowrka Macluumaad iyo Diiwaannada Ardayda:

Burburin micneheedu waa sheyga burburintiisa ama ka qaadka wixii lagu garan lahaa shaqsiga dabadeed si macluumaadku u noqdaan kuwo aan shaqsi ahaan qofka aan lagu garan waxa hadda ka dambeeya.

Diiwaannada Wabarasho micnaheedu waa nooca diiwaannada lagu sheegey hoosta qeexitaanka “diiwaannada waxbarasho” ee ku jira 34 CFR Qaybta 99 (xeerarka meelmarinta Xuquuqaha Waxbarashada Qoys iyo Sharciga Xog-dhowrka 1974, 20 U.S.C. (FERPA)).

Degmo dusgi ama ururka go'aaminta macnahoodu waa degmo dusgi ama urur go'aamint, hay’ad ama machad kasta oo ururiya, haya, ama isticmaala macluumaad shaqsi ahaan loo garan karo, ama laga helo macluumaad iyadoo la raacayo IDEA Xeerarka Waxbarashada gaarka ah ee Vermont.

Shaqsi ahaan waxa qofka lagu garan karo macneheedu waa macluumaad ay la socoto:

- Magaca ilmahaaga, magacaaga waalid ahaan, ama magaca qof kale oo xubin qoys ah;
- Cinwaanka ilmahaaga;
- Aqoonsi shaqsi ahaan lagu garan karo, sida lambarka sooshal sekuuritiga ama lambarka ardaynimo; ama
- Diiwaan-qorka astaamo shaqsi ama macluumaad kale oo suurta-galeneysa in lagu garto ilmahaaga oo si hubaal ahaan ah macquul u ah.

Ogeysiiska Waalidiinta

Xeerka 2365.2.1

Waaxda Waxbarashada Vermont ayaa ah inay bxixiso ogeysiis ku-filnnaan leh sidii si buuxda leh u wargaliso waalidiinta arrimaha ku saabsan xo-dhowrka macluumaadka qofka lagu garan karo, oo ay ku jiraan:

- Sifeynta isku jirta illaa xadka lagu bixiyey ogeysiiska oo loogu gudbiyay luqadahooda hooyo kooxaha dadyowga kala dudwan ee ku nool Gobolka;
- Sifeynta carruurta laga hayo macluumaadka la garan karo, nooca macluumaadka la raadinayo, habka Gobolku ugu talagalay inuu u isticmaalo ururinta macluumaadka (marka lagu daro ilaha macluumaadka laga soo urruriyey) iyo siyaabaha loo isticmaali doono macluumaadka;
- Soo koobitaan ah ujeddooyinka iyo qaabsocodyada ha’yadaha ka qayb-qaadanaya arrinta ay waajibadka ku tahay inay raacaan marka la eego keydinta, daah-uga-

qaadka kooxaha saddexaad, haynta iyo burburinta macluumaadka shaqsiga lagu garan karo; iyo

- Sifeyn ah dhammaanba xuquuqaha ay waalidiinta iyo carruurtu leeyihiin marka loo eego macluumaadkan, marka lagu daro xuquuqda hoos timaad Sharciga Xog-dhowrka iyo Xuquuqda Waxbarashada Qoyska (FERPA) iyo xeerar fulinteeda ku jirta 34 CFR Qaybta 99.

Kahor inta aan lagu kicin hawlo weyn oo aqoonsi, soo helitaan, ama qiimayn (taasi waliba waxa loo yaqaan "helidda ilmaha") ogeysiisku waa waajib in lagu daabaco wargeysyada ama laga sheego warbaahinta kale, ama labadoodaba,oo faafin ku filan wargalinta waalidinta Gobolka oo dhan waxqabadka, si loo helo, loo garto, iyo loo qiimeeyo carruurta u baahan waxbarashada gaarka ah ama adeegyada la xiriira.

Xuquuqda Marin-u-helka xogta

Xeerka 2365.2.2

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maareynta tacliin waa inay adiga kuu oggolaadaan inaad fiirso diiwaanno kasta oo la xiriira ilmahaaga ee la ururiyay, la hayo, ama ay isticmaalaan degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin markay hoos timaad Sharciga waxbarashada gaarka ah ee federaalka iyo gobolkaba.

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maareynta tacliin waa inay u hooggaansanaato codsigaaga inaad fiiriso oo dib u eegto wixii diiwaanno waxbarasho ah ee ilmahaaga laga hayo, oo aan lagugu daahin si aan loo baahnayn iyo ka hor kulan kasta oo ku saabsan barnaamijka waxbarashada shaqsiyeysan (IEP), ama dhageysi kasat oo habraaca cadaaladda eexla'aanta ah (oo ay ku jirto kulanka go'aaminta ama dhageysi ku saabsan edbinta) iyo keys kama dambeystu tahay 45 maalmood ka dib markaad codsiga sameysay.

Xaqa aad u leedahay inaad fiiriso ama dib aad u eegto diiwaannada waxbarashada waxa ka mid ah:

- Xaqa aad u leedahay inaad ka hesho jawaab degmadaada dugsi ama ururkaaga maareynta tacliin ee weydiiskagaa macquulka ah oo ku saabsan faahfaahinta iyo micneynta diiwaannada;
- Xuquuqda aad u leedahay inaad ka codsato degmadaada dugsi ama ururkaaga maareynta tacliin dugsi inay ku siiso nuqullada diiwaanka haddii si wax ku ool leh aadan u fiirin oo dib u eegin diiwaannada haddii aad hesho nuqullada mooyee; iyo
- Xaqa aad u leedahay inaad yeelato inuu wakiilkaagu fiiriyo oo u dib u eegto diiwaanada.
- Degmadaada dugsi ama ururkaaga maareynta tacliin ayaa u qaadaneysa inaad awood u leedahay si aad u fiiirso oo dib ugu noqoto diiwaannada la xiriira ilmahaaga haddii lagugula taliyo mooye inaadan haysan awood hoos timaad sharciyada gobolka ee xukuma arrimaha ay ka mid yihiin kala-tagga, iyo/ama is-furka.

Diiwaanka Marin-u-helka

Xeerka 2365.2.3

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin waa inay hayaan diiwaannada qolooyinka marinka u hela diiwaannada waxbarashada la ururiyay, la hayo, ama la isticmaalo markay hoos timaad Sharciga waxbarashada gaarka ah ee federaalka iyo gobolkaba, (laga reebo marin-u-helka waalidka iyo shaqaalaha u fasaxan ee degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin) oo ay ku jirto magaca kooxda, taariikhda marinka loo siiyey, iyo ujeeddada kooxda awoodda loo siiyey inay isticmaalaaan diiwaannada.

Diiwaannada Laga Hayo Ilmaha Hal kuwa ka Badan

Xeerka 2365.2.4

Haddii midkoodna ha noqdee u diiwaannada waxbarashada ay ku jiraan macluumaad ku saabsan hal ilmo kuwo ka badan, waxaad xaq u leedahay inaad baadho oo aad dib u eegto kaliya macluumaadka la xiriira ilmahaaga ama in lagu ogeysiiyo macluumaadkaas goonida ah.

Liiska Noocaca iyo Goobaha Macluumaadka

Xeerka 2365.2.5

Markaad codsato, degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin waa inay ku siiyaan liiska muujinaya noocyada iyo diiwaanka goobaha waxbarasho laga soo ururiyay, lagu hayey ama ay hay'addu isticmaashay.

Ajuurada

Xeerka 2365.2.6

Waxaa laga yaabaa in degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ay kugu dallacdo ujro nuqullada diiwaanka laguugu sameeyey markay hoos timaad xeerarka waxbarashada gaark ah ee dawladda federaalka ama gobolkaba, haddii ujradu aaney kaa joojineynin adiga inaad isticmaasho xuquuqdaada awoodeed ee aad ku aragto diiwaanka oo aad dub-ugu-eegto diiwaannadaas.

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin yaan kugu dallacayn ujro raadinta ama la soo baxa macluumaadka hoos yimaad xeerarka waxbarashada gaark ah ee dawladda federaalka ama gobolkaba.

Wax ka Beddelka Diiwaannada waxa ku Qoran Markuu Waalidku Codsado

Xeerka 2365.2.7

Haddi aad aamminsantahay in macluumaadka diiwaanka waxbarashada ee ku saabsan ilmahaaga lagu ururiyey, lagu hayo, ama lagu isticmaalo markay hoos timaad xeerarka federaalka iyo gobolka ee waxbarashada gaarka ah ay yihiin khalad ama wax habaabin leh, ama wax ku xadgudbaya asturnaanta shaqsiga ama xuquuqaha kale ee ilmahaaga,

waxaad weydiisan kartaa inay degmadaada dugsi ama ururukaaga maarynta tacliin ee haya macluumaadku inay saxaan macluumaadka.

Degmadaada dugsi ama ururukaaga maarynta tacliin waa inay go'aansato beddelaadda macluumaadka iyaga oo raacaya codsigaagu, gudaheed wakhti muddo macquul ah marka la helo codsigaaaga.

Haddii ay degmadaada dugsi ama ururukaaga maarynta tacliin diiddo inay beddesho macaluumaadka iyada oo raacaysa codsigaaga, waa inay kuu sheegtaa adiga diidmada oo kuu sheegtaa xuquuqda aad u leedahay dhageysi loogu talagalay ujeeddadan sida lagu sifeeyey hoosta cinwaanka Fursadda Loogu Talagalay Dhageysiga.

Fursadda Loogu talagalay Dhageysiga

Xeerka 2365.2.8

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin waa inay, marka la codsado, ku siiyaan fursad lagu dhageysto sidii aad uga horiman lahayd macluumadka ku qoran diiwannada waxbarashada ee ku saabsan ilmahaaga sidii loo hubin lahaa ineyna ahayn khalad, marin habaabis, ama haddii kale mid ka hor imaneysa xog-dhowrka iyo asturmaamta shaqsiga ama xuquuqyada kale ee ilmaha.

Dhageysi ka-horimaadka ku ah macluumaadka ku qoran diiwaannada waxbarashada ayaa waajib ah in lagu qabto qaabsocodyada dhageysiyada oo kale ee hoos yimaad Sharciga xog-dhowrka iyo Xuquuqaha Waxbarashada ee Qoyska (FERPA).

Natiijada Dhageysiga

Xeerka 2365.2.9

Haddii, natiijo ahaan dhageysiga, degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin u go'aamiyo in macluumaadku khalad yihiin, habaabis yihiin, ama haddii kale ay ku xadgudbayaan asturnaanta (xog-dhowrka) shaqsi ee ilmaha, waa inay beddelaan macluumaadka awgeed sababtaas oo ay kuugu wargaliyaan beddeladaas qoraal ahaan.

Haddii, natiijo ahaanteed dhageysiga, degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin go'aamiso ineyna macluumaadku khalad ahayn, habaabis, ama haddii kale oo ayna ku xadgudbayn asturnaanta shaqsi ahaan ilmaha, waa inay kuu wargalisaa inaad u leedahay xuquuq ku-darka diiwaanka waxbarasho ee ilmahaaga ay ka hayaan kelmado ka faalloonaya macluumaadka ama bixinaya sababaha aad ku diiddantahay go'aanka dadegmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin .

Faahfaahintan oo kale ee la dhex galiyo diiwaannada ilmahaagu waa inay:

- Hayso degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin iyada oo ka qayb ka mid ah aha diiwaannada ilmahaaga illaa inta diiwaanku ama qaybta la isku haysto lagu hayo degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ; iyo
- Haddii degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ay daaha looga qaaddo diiwaanka ilmahaaga ama qaybta la isku diiddan yahay dhinac kasta ha ahaadeene, faahfaahinta waa waa in daaha looga qaadaa waliba dhinacaas.

Oggolaansho Daah-uga-Qaadka macluumaadka Shaqsiga Lagu Garan Karo

Xeerka 2365.2.11

Marka laga reebo daah-uga-qaadyada sharci fulinta loo oggol yahay iyo awoodaha garsooreed oo ayna u baahnayn FERPA oggolaansho waalid, oggolaanshahaaga waa in la helaa kahor intaan macluumaadka shaqsiga lagu garab karo aab daaha looga qaadin dhincayada aan ahayn saraakiisha hay'adaha arrinta ka qaybqaadanaya. Laga reebo xaaladaha hoosta lagu dhigey markay hoos timaad, oggolaanshahaagu looma baahana yahay kahor marka macluumaadka shaqsiga lagu garan karo loo sii-daayo saraakiisha hay'adaha ka qaybqaatayaasha oo ujeeddadeedu tahay iney waafaqdo shuruudaha xeerarka waxbarashada gaarka ah ee federaalka iyo gobolka.

Oggolaanshahaaga, ama oggolaanshaha ilmo u qalma ee qaan-gaar ah sharicga gobolka hoostiisa, waa in la helaa kahor inta macluumaadka shaqsiga lagu garan karo aan loo sii-deyn saraakiisha hay'adaha ka qayb-qaatayaasha ah ee dhiibaya ama bixinaya adeegyada ku-meelgaarka ah.

Haddii ilmahaagu uu dhigto ama u tagi doono dugsi madaxbannaan oo aan ku ool isla degmada dugsi ama ururka maarayn tacliin ee aad ku nooshahay, waa waajib in la helo oggolaanshahaaga kahor inta macluumaadka shaqsiga lagu garan karo ee ilmahaaga aan loo sii kala sii-deyn dhexdooda saraakiisha degmada dugsi ama ururka maarayn tacliin ee u ku yaallo dugsiga madaxbannaan iyo saraakiisha degmadaaada dugsi ama ururka maarayn tacliin ee aad deggan tahay.

Dhowritaannada

Xeerka 2365.2.12

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin waa inay ilaaliyaan macluumaadka shaqsiga lagu garan karo xog-dhowrkooda markay yihiin heerarka ururinta, keydinta, daah-uga-qaadka iyo burburintoodaba.

Hal sarkaal oo jooga degmada dugsigaaga ama ururkaaga maaraynta tacliin waa inuu qaadaa masuuliyadda hubinta xog-dhowrsanaanta mid kasta oo ka mid ah macluumaadka shaqsiga lagu garan karo.

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin waa inay lahaadaan ujeeddooyin iyo qaabsocoyo sidii loo hubin lahaa inay dhammaan dadka ururinaya ama isticmaalaya macluumaadka shaqsiga lagu garan karo ay qaataan tababbaritaan ama waxbarasho ku saabsan Qaabsocodyada iyo ujeeddooyinka Vermont ku leedahay hoostiisa sharcigan iyo 34 CFR Qaybta 99.

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin waa inay u hayaan, sidii dadweynuhu u fiirin lahaayeen, liistada magacyada iyo xilalka ay hayaan shaqaalahaas ka midka ah hay'adda ee laga yaabo inay marin u leeyihiin helitaanka macluumaadka shaqsiga lagu garan karo.

Burburinta Macluumaadka

Xeerka 2365.2.13

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin waa inay adiga ku ogeysiiyaan marka macluumaadka shaqsiga lagu garan karo ee la ururiyey, la hayey am la isticmaalay aan loogu baahnayn hadda ka dambow in loogu sii wado siinta adeegyada waxbarasho ilmahaaga.

Macluumaadka waa in la burburiyaa markaad codsato. Hase yeeshe, diiwaan joogto ah oo ilmahaaga magaciisa/eeda, ciwaanka iyo lambarka taleefanka, darajadiisa ama darajdeeda fasal, diiwaanka ka-qaybgal dugsi, xiisadaha la qaatay, heerka darajada fasal la dhammeeyay iyo sannadka la dhammeeyay ayaa laga yaabaa in la hayo iyada oo aan xad wakhti lahayn.

Qaabsocodyada Maammuleed ee Cabashada

Waxay ku kala duwan yihiin Habraaca Dhagesiga ee Cabashada iyo Qaabsocodyada Maammuleed ee Cabashada

Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont ayaa u sifeynaya qaabsocoyo gaar ah oo loogu talagalay cabashooyinka maamuleed iyo cabashooyinka iyo dhgeysiyada habraaca cadaaladeed leh. Sida hoosta lagu sharaxay, qofka shaqsiga ah ama urur ayaa xerayn kara cabasho maamuleed oo sheeganeysa inay ku xadgudbay shurrudaha IDEA iyo Xeerarka Waxabarshada Gaarka ah ee Vermont degmo dugsi ama urur maarayn tacliin, Waaxda Waxbarashada Vermont ama hay'ad kasta oo dawladeed.

Adiga kaliya ama degmadaada dugsi ama ururkaaga maareynta ayaa ka xerayn kara habraac cadaaladeed cabasho oo ku saabsan arrin kasta oo ku lug leh soo jeedinta ama diiditaanka sidii loogu bilaabi lahaa ama loogu beddeli lahaa garashada, qiimeynta, ama meeleynta waxbarasho ee ilmahaaga leh naafanimada, ama siinta ilmahaaga waxbarasho dowli lacag-la'aan oo habboon oo (FAPE). In kasta oo guddoomiyaha Waaxda Waxbarashada Vermont ay tahay inuu ku xalliyo cabashada Gobolka gudahooda 60-maalmo shaqo ee muddo go'an ah, haddii muddada go'an sida habboon loo beddelo mooyee, waa inuu sarkaal dhageysi habraaca cadaaladeed ee eexasho-la'aanta uu dhageystaa cabshada habraaca cadaaladeed leh (haddii aan lagu xallin kulan ku xallin ama iyada oo loo marayo dhexdhexaadin) oo u ku soo-saaro go'aan qoran gudahooda 45-maalmo shaqo oo muddo go'an ah kadib dhammadka muddada xallinta, sida lagu qeexay dokumentigan iyada hoos timaad cinwaanka Nidaamka Xallinta, haddii mooye sarkaalka dhageysigu u bixiyo muddo u dheereyn markaad weydiisato ama degmadaada dugsi ma urrurkaaga maarayn tacliin ay weydiistaan. Cabashada maamuleed iyo habraaca cadaaladeed ee cabashada, qaabsocodyada xallinta iyo dhageysiga ayaa lagu sifeynayaa si aad uga sii badan hoosta.

Qaabsocodyada Maammuleed ee Cabashada

Xeerka 2365.1.5

Qof ama urur kasta oo sheeganaya dugsi degmo ama urur maarayn tacliin ama hay'ad dawladeed ay ku kacday wax ka duwan shuruudaha IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont ayaa ku xerayn kara cabasho qoran oo saxeexan Guddoomiyaha Waxbarashada oo u gudbin kara nuqul ah cabashada degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin ama hay'ad dawladeed oo u adeegeysa ilmaha isla wakhtigaas.

Cabashadu waa inay la socdaan--

- Kelmado tilmaamaya in hay'ad dawladeed aya ku xadgudubtay shuruud hoos timaad IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont;
- Xaqiiqaha ya kelmaduhu ku dhisan yihiin;
- Saxeexa iyo macluumaadka lagula xiriirayo cawdaha; iyo

- Haddii la sheeganayo xadgudubyo lagu sameeyey ilmo gaar ah--
- Magaca iyo cinwaanka meesha u deggan yahay ilmuhu;
- Magaca dugsiga uu ilmuhu u dhigto;
- Haddii ilmuhu u yahay ilmo ama dhallinyaro guri-la'aan ah (marka ku jirto micnaha qaybta 725(2) ee Xeerka Gargaarka Guri-La'aan McKinney-Vento (42 U.S.C. 11434a(2)),, ilmaha macluumaadka lagula xiriirayo ee jiraq iyo magaca dugsiga ilmuhu u dhigto.
- Sifeynta nooca dhibaatada ilmaha haysata, oo ay ku jirto xaqiiqooyinka la xiriira dhibaatada; iyo
- Xallinta la soo jeediyey ee dhibaatada illaa inta la garanayo ee ay heli karaan dhinac wakhtiga la xereeeyo cabashada.

Laga reebo cabashooyinka habraaca cadaaladeed leh ee lagu sheegey hoosta sharciga under Rule 2365.1.6, cabashadu waa inay sheegataa xadgudub dhacay waxaan ka badnayn hal sano ka hor taariikhda cabashada la helay.Marka la helo cabashada, ayuu Guddoomiyuhu u magacaabi qof cabashada baara oo socodsiiya baaritaan. Baaraha cabashada ayaa u fiirsan doona caddaynta la dhiibay iyada oo ka socota qofka cabanaya iyo marka y ka socoto dugsigaaga degmo ama ururkaaga maarayn tacliin. Iyada oo ay tahay xilka baaraha cabashada, cabashada ayaa laga yaabaa in lagu baaro iyada oo loo maro dariiqa dib-u-eegga diiwaanka, wada kulanka, dhageysiga, ku baaritaanka goobta, iyo kuwaas oo la isku daro qaarkood. Cabasho baaruhu waxaa laga yaabaa inuu siiyo cawdaha fursad uu ku soo gudbiyo warbixin dheeraad ah, qoraal ama afka ka sheego midkoodba ha ahaatee, taasi oo ku saabsan cabashada la sheeganayo. Cabasho baaruhu waxaa laga yaabaa waliba inuu siiyo hay'adda dawladeed fursad ay ku jawaabaan u soo jeedin in la xalliyo cabashada, ama, markaad oggolaato, fursad inaad dhexdhexaadin gashaan ama si kale oo lagu xalliyo cabashada.

Haddii dhageysi jadwalka la galiyey, cabasho baaraha ayaa leh awoodda iyo waajibaadyada hoosta ku qoran:

- Inuu socodsiiyo shirarka dhageysiga ka horreeya;
- Inuu socodsiiyo dhageysiyada laga yaabaa loo baahdo;
- Diyaariyo helitaannada soo-jeedin ee xaqiiqooyinka iyo gababgabada sharci ee loogu talagalay go'aaminta sarkaalka dhageysiga; iyo
- Wixii kale ee awoodo iyo waajibyo ah ee lagu tilmaamayo Xeeka Guddiga Waxbarashada Gobolka ee 1236.1.

Iyada oon ka dambayn lixdan maalood kadanbow helitaanka cabashada, guddoomiyaha ayaa soo saari doona go'aan qoran. Muddadan xaddidan waxaa laga yaabaa in kordhiyo kaliya haddii xaalado aan caadi ahyni soo kordhaan marka loo eego cabasho gaar ah.

Marka u baaritaanka cabashadu go'aamiso inu dib uga dhac jiro in la bixiyo adeegyada habboon, warbixinta baaritaanka ayaa ka hadli doona sidii dib-u-dhedhexaadin loogu samayn lahaa adeegyadaas, iyada oo ay ku jiraan, kolba sida ay u habbon tahay, bixinta

lacag u celin ama ficil kale oo lagu saxayo oo ku habboon baahida ilmaha, iyo waliba sida ugu habboon ee lagu bixinayo mustaqabalaka adeegyada la siinayo dhammaan carruurta naafanimada leh.

Haddii cabasho qoran la helo oo iyaduna ah waliba mawduuc ahaan dhageysi habraac cadaaladeed leh , ama ay ku jiraan arrimo badani oohhal ama qayb ka badani dhageysigaasi, waa in baaritaanku arrintaa qayb kasta oo ka mid ah cabashada u dhigo gar-qaadka lagu jiro illaa inta la gabagabeynaayo dhageysigaasi.

Hase ahaate, arrin kasta oo cabashada ah oo aan ka mid ahayn ficilka habraaca cadaaladeed leh ayaa lagu xallin doonaa iyada oo la istcimaalayo xadadka wakhtiga iyo qaabsocodka korka lagu sifeeyey.

Haddii arrin lagu soo qaado cabashada oo hore go'aankeeda logu gaaray dhageysi habraac cadaaladeed leh kaasi oo ka dhexeeya dhinacyo isku mid ah, go'aanka dhageysigu sharci qabasho ayuu leeyahay oo cawdaha ayaa loogu wargalin doonaa sidaas.

Cabasho ayaa waliba laga yaabaa in laga xereeyo arrinta ku saabsan Xeerka Qaybta C ee IDEA. Baaritaanka cabashada Qaybta C ayaa la buuxin doonaa iyada oo iskula dubbarido Hay'adda Adeegyada dadweynaha ee Waaxda CaafimaadkaAdeegyada, Qaybta Kobaca Ilmaha. Cabasho qoran ayaa ah in loo diro Maareeyaha barnaamijka qoyska, Ilmaha Dhasha ah, Socod-Baradka ku yaal 103 S.Main Street, Waterbury, Vermont 05671-0204.

Qaabsocodyada Cabashada Habraaca Cadaaladeed leh

Habraaca Cadaaladeed ee Cabasho

Xeerka 2365.1.6

Guud Ahaan

Adiga ama degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ayaa ka xerayn kara cabasho habraac cadaaladeed leh oo ku saabsan arrin kasta oo ku lug leh soo jeedinta ama diiditaanka sidii loogu bilaabi lahaa ama loogu beddeli lahaa garashada, qiimeynta, ama meeleynta waxbarasho ee ilmahaaga ama siinta ilmahaaga waxbarasho dawladeed oo habboon oo bilaash ah (FAPE).

Cabashada habraaca cadaaladeed leh waa inay shegataa xadgudub dhacay waxaan ka badnayn laba sano kahor intaadn adiga iyo degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ogaateen ama aad ogeydeen ficilka la sheegtey ee Cabashada habraaca cadaaladeed leh salkeedau ku dhisan yahay. Marka la reebo, haddii aad iskaa aad ugu meeleeysey ilmahaaga dugsi madaxbannaan oo aad raadineyso in lacag laguu soo celiyo, cabashada habraaca cadaaladeed leh waa in lagu xereeyaa gudahooda 90 maalmood marka laga bilaabo meeleynta.

Jadwalka korka ku yaal kuma khuseeyo adiga haddii aad ku xereyn kari weyday cabashada habraac cadaaladeed leh sabab ah:

- Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin oo si gaar ah sawir aan jirin uga bixisay inay xallisay dhibaatada ama arrinta lagu soo qaaday codsiga dhageysiga; ama
- Degmadaada dugsi ama ururkaaga maareynta tacliin oo adiga kaa qariyey macluumaad looga baahnnaa inay ku siiyaan iyada oo hoos timaad sharciga IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont.

Macluumaad waalidiinta loogu talagalay

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin waa inay kuu wargalisaa adiga haddii ay jiraan adeeg sharci oo bilaash ah ama jaban iyo adeegyada la halmaala ee laga heli karo agagaarka haddii aad codsato macluumaadka, ama haddii adiga ama degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin aad xereysaan cabasho habraac cadaaladda leh.

Bilowga dhageysiga habraac cadaaladeed leh

Xeerka 2365.1.6.2 – 2365.1.6.6

Guud Ahaan

Si aad aad u codsato dhageysi, adiga ama degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin (ama looyarkaaga ama looyarka degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin) waa inay siiyaan dhinaca kale cabasho habraac cadaaladeed leh. Cabashadaasi

waa inay wadataa dhammaan waxyaabaha hoosta ku yaal oo waa inu in xog-dhowris yeeshaa.

Adiga ama degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin, kiinna xereeyey cabashadu, waa inuu siiyaa Waaxda Waxbarashada ee Vermont nuqul ah cabashada iyada oo la isticmaalayo foom u bixiyo Guddoomiyuhu.

Waxa ku jira Cabashada

Cabashada habraaca cadaaladda waa inay la socdaan:

- Magaca ilmaha;
- Cinwaanka sheegaya ilumhu meesha u degganyahay;
- Magaca dugsiga ilmaha;
- Haddii ilmuhu u yahay ilmo ama dhallinyaro guri-la'aan ah, ilmaha macluumaadka lagula xiriirayo iyo magaca dugsiga ilmaha;
- Sifeynta nooca dhibaatada ilmaha ee la xiriita ficilka soo jeedinta ama diidtaanka, oo ay ku jirto xaqiiqooyinka la xiriira dhibaatada; iyo
- Xallinta la soo jeediyey ee dhibaatada illaa inta la garanayo ee aad heli karto adigu ama degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin heli kariyeen wakhtigaas.

Ogeysiiska loo baahan yahay kahor cabashada habraac cadaaladeed leh

Adiga ama degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin ayaan yeelan karin dhageysi habraac cadaaladeed leh illaa, adiga ama degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin (ama looyarkaaga ama looyarka degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin) ay xereeyaan cabasho habraac cadaaladeed leh oo ay la socdaan macluumaadka korka lagu taxay.

Kaafi ahaanta (ku filnnaanta) cabasho

Si horay ay ugu socon lahayd cabasho habraac cadaaladeed lehi , waa in loo qaddariyaa inay kaafi tahay (Ku filnnaan leedahay). Cabashada habraac cadaaladeed leh ayaa loo qaddarin doonaa ina kaafi tahay (inay qancisay waxa ku qoran shuruudaha korka) haddii dhinaca helaya cabashada habraaca cadaaladda (adiga ama degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin) ay ugu wargaliyaan mooyee sarkaalkaga dhageysiga iyo dhinaca kale qoraal ahaan, muddo 15 maalmo taarikheed gudahood marka aad hesho cabashada, in dhinaca helyaa rumaysan yihiin in cabashada habraac cadaaladeed leh ayana la kulmin shuruudaha korka ku taxan.

Gudahooda shan maalmo taariikheed marka la helo u wargalinta in dhinaca helaya cabshada (adiga ama degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin) aad u qaddarisaan cabashada habraaca cadaaladeed leh inay tahay kaafi-la’aan ama (ku-filnaan la’aan), sarkaalka dhageysiga ayaa ah inuu go’aamiyo haddii cabashada habraaca cadaaladeed leh u la kulmayo shuruudaha korka ku taxan, oo adiga iyo degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin la idiinku wargaliyo qoraal ahaan isla markaaba.

Wax-ka-beddelka Cabashada

Adiga ama degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin ayaa laga yaaba inaad beddeshaan cabashada kaliya haddii:

- Dhinaca kale ay ku oggolaadaan wax ka beddelka qoraal ahaan oo la siiyo fursad ay ku xalliyaan cabashada habraaca cadaaladeed leh iyada oo loo marayo kulanka xallinta, ee hoosta lagu sifeeyey; ama
- Wax aan ka dambayn shan maalmood ka hor inteyna dhageysiga habraaca cadaaladeed leh ayna bilaabmin, u sarkaalka dhageysiga bixiyo oggolaansho inuu qabsoomo beddeladaasi.

Haddii dhinaca cabanya (adiga ama degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin) u beddel ku sameeyo cabashada habraaca cadaaladeed leh, jadwalka kulanka xallinta arrinta (gudahooda 15 maalmo taarikheed laga bilaabo markii la helay cabashada) iyo wakhtiga muddada loo qabto xallinta (gudahooda 30 maalmo taarikheed laga bilaabo markii la helay cabashada) ayaa bilow mar kale taariikhda cabashada la beddelay.

Jawaabta degmada dugsi ama ururka maarayn tacliin ay ka bixiyaan cabasho habraaca cadaaladeed leh.

Haddii degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin ayan kuugu soo dirin ogeysiis hore oo qoran, sida lagu sifeeyey hoostiisa cinwaanka Ogeysiika Qoran ee Hore, ee ku saabsan mowduuca ku jira cabashadaada habraaca cadaaladeed leh, degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin waa inay, gudaheeda 10 maalmo taariikheed markay helaan cabashada habraaca cadaaladeed leh, adiga kuu soo diraan jawaab ay la socdaan:

1. Faahfaahinta sababta degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin u soo jeedisay ama u diiddey inay tallaabada lagu soo qaaday cabashada habraaca cadaaladeed leh;
2. Sifeyn waxyaabaha kale ee la dooran karo ee ilmahaaga kooxda barnaamijka waxbarashada la shaqsiyeey (IEP) ay u qaddariyeen iyo sababaha loo diiday waxyaabaha la dooran karo;
3. Sifeyn ah qaabsocdka qiimayn kasta, qiiyaasta, diiwaanka ama warbixinta degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin isticmaashay ee ay ku saleysay tallaabooyinka la soo jeediyay ama la diiday; iyo
4. Sifeyn qodobbada kale ee la xiriira tallaabada degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin uu soo jeediyay ama diiday.

Bixinta macluumaadka sheyda 1-4 ee korku kama hor-istaagayaan in degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin inay ku doodaan in cabashada habraaca cadaaladeed lehi inayna ku filmnaan lahayn.

Jawaabta dhinaca kale ee ku wajahan cabashada habraaca cadaaladeed leh

Marka laga reebo sida lagu sheegey cinwaanka korka ugu dhow ku yaal, jawaabta degmada dugsi ama ururka maarayn tacliin ee ku wajahan cabashada habraaca cadaaladeed leh, dhinaca heleysa cabashada habraaca cadaaladeed leh waa inay, gudahood 10 maalmo taariikheed markay helaan codsiga, ugu diraan jawaab si gaar uga hadleysa arrimaha cabashada.

Dhexdhexaadinta

Xeerka 2365.1.4

Guud Ahaan

Nidaamka dexdhexaadintu u bixiyo Guddoomiyuhu ayey heli karaan waalidiinya ardayda qaba naafanimada, degmada dugsi ama ururka maarayn tacliin iyo hay'adaha kale dawladeed ee ku jira khilaafka waxbarashada gaarka ah, oo ay ka midka yihiin arrimaha ka yimid xereynta cabashada habraaca cadaaladeed leh.

Shuruudaha

Qaabsocoyadu waa inay hubiyaan inuu nidaamka dhexdhexaadintu:

- Ay tahay mid ikhtiyaari ka ah dhinacaaga iyo dhinaca degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin;
- Aan loo isticmaalin in lagugu diido ama dib loogu dhigo xuquuqdaada aad u leedahay dhageysiga habraaca cadaaladeed leh, ama laguugu diido xuuqo kasta oo oo aad hoosteeda ku leedahay IDEA iyo Xeerarka Waaxda Waxbarashada ee Vermont; iyo
- Inuu socodsiiyo dhexdhexaadiye u-qalma arrinta oo bilaa eexasho ah, laguna tababbaray qaabab dhexdhexaadin wax ku ool leh.

Waaxda Waxbarashada ayaa haysaa liis dad ah dhexdhexaadiye u-qalma arrinta oo bilaa eexasho ah oo aqoon u leh sharciga iyo xeerarka bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira.

Waaxda waxbarashada ayaa ka mas'uul ah kharashka nidaamka dhexdhexaadinta, oo ay ku jirto kharashka shirarka.

Kulan kasta oo ah nidaamka dhexdhexaadinta waa in jadwalka loo galiyaa hab wakhti ahaaneed oo waa in lagu qabtaa meel kuu habboon adiga iyo degmadada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin.

Haddii adiga iyo degmadada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin aad ku xallisaan khilaaf idinka oo isticmaalaya nidaamka dhexdhexaadinta, labadiina dhincaba waa inaad gashaan heshiis sharcigu qabanayo oo:

- Tilmaamaya dhammaanba wada xaajoodka laga wada hadlo muddada nidaamka dhexdhexaadintu waa kuwo xogdhowran oo aan loo isticmaali karin caddayn ahaan hadhow dhageysi habraac cadaaladeed leh ama qaabsocod madani ah; iyo
- Aad saxeexdeen labadiinuba adiga iyo wakiilka degmadada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin ee leh awood sharci qabasho degmadada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin.

Heshiis saxeexan oo qorani waxa lagu meel-marin karaa maxkamad Gobol oo kasta u-qalanta awoodda (maxkamad Gobol oo awoodda u leh dhageysiga kiiska noocani oo kale ah) ama maxkamad degmo oo Mareykanka ka tirsan.

Wada hadallada ka dahcay wakhtiga lagu jiray dhexdhexadinta waa inay xog-dhowrnaantaa (qarsoonaataa). Looma isticmaali karo caddayn ahaan dhageysi kasta

habraac cadaaladeed leh oo kasta ama qaabsocod madani ah oo maxkamad Federaal ama maxkamad Gobol oo kasta oo hela caawimaad iyada oo hoos timaad IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont.

Codsiyada qoran ee lagu weydiisanayo dhexdhexaadinta ayaa loo soo gudbin karaa Waaxda Waxbarashada Vermont, Adeegga Dhexdhexaadinta Waxbarashada Gaarka ah (VDE-SEMS), 120 State Street, Montpelier, Vermont 05620-2501.

Marka la helo codsigan oo kale, Waaxda ayaa adiga kuu soo diri doonta Xuquuqda Waalidka ee ku jirta Ogeysiiska Waxbarashada Gaarka ah oo waxay u diri doontaa dhammaan dhinacyada la dhexdhexaadinayo Qaabsocodyada dhexdhexaadinta.

Heshiiska dhexdhexaadinta qoraal aahaan ayuu noqon doonaa oo ku qoran foom u ansixiyey Guddoomiyuhu oo ay saxeexeen dhammaan dhinacyadu. Haddii codsiga u noqon kari waayo qoraal sabab xaalado gaar ah awgood, oo ay ka midka yihiin karti la'aanta in lagu wada xiiriiro qoraal, codsiga ayaa laga yaabaa in lagu sameeyo qaab kale wada xiriir.

Eex-la'aanta Dhexdhexaadiyaha

Dhexdhexaadiyuhu:

- Dhexdhexaadiyuhu waa inuusan ahayn shaqaale ka tirsan Waaxda Waxbarashada Vermont ama degmada dugsiga ama ururka maaraynta ee ku dhex jira waxbarashada ama daryeelka ilmaha; iyo
- Waa inuuna u yeelan xiise gaar oo shaqsiyeed ama shaqo oo keenaya iska-horimaad xaqiiqo-raadinta dhexdhexaadiyaha.

Qof sida kale ugu qalma inuu noqdo dhexdhexaadiye ma aha shaqaalaha degmada dugsi ama ururka maaraynta tacliin ama Waaxda Waxbarasha vermont kaliya iyada oo sababtu tahay isaga ama iyada waxaa lacagta siiya VTDOE degmada dugsi ama ururka maaraynta tacliin sidii ay u qaadaan xilka dhedhexaadiye.

Meeleynta Ilmaha Marka Cabashada Habraaca Cadaaladda iyo Dhageysiga La Sugayo

Xeerka 2365.1.11

Marka laga reebo sida lagu sheegayo hoosta cinwaanka Qaabsocodyada Marka La Edbinayo Ardayda Naafanimada leh, marka cabashada habraaca cadaaladda loo diro dadka dhinaca kale ka soo jeeda, muddada lagu jiro wakhtiga xal helitaanka, iyo inta la sugayo go'aanka kasta ee ka soo fulaya eex-la'aan dhageysiga habraac cadaaladeed leh ama maxkamadda tallaabo sharciyeedkeeda, haddii adiga iyo degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin aad ku heshiisaan si kale mooye, ilmahaagu waa inuu ku jiro isaga/ama iyada waxbarashada lagu meeleeyey caadirkan.

Haddii cabashada habraac cadaaladeed leh ay ka mid tahay codsigii bilowga ahaa ee galista dugsiga dowladda ah, ilmahaaga, iyadey la socoto oggolaanshahaagu, waa in lagu meeleeyaa barnaamij dugsiga dowladda ee caadiga ah illaa ay dhammaanyaan habsocodyaada sharci.

Haddii u go'aanka sarkaal dhageysi markay tahay waalidka ilmaha ee ku dhageysi habraac cadaaleed in beddelka meeleyntu habboon tahay, meeleyntaas ayaa loo qaadan inay tahay heshiis u dhexeeya degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin iyo adiga.

Haddii codsiga cabashada habraac cadaaladeed leh ay la xiriirto codsiga bilowga adeegyada hoos yimaadda IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont ilmaha oo kala-guur ugu jira marxaladaha isbeddelka adeegyada kala ah Qeybta C ee IDEA oo gudbaya IDEA maadaama ilmahaagu noqday saddex jir, degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin loogama baahna inay bixiyaan adeegyada Qeybta C ee ilmuhu heli jiray.

Haddii ilmaha loo garto inuu u qalmo hoosteeda IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont adiguna aad bixisid oggolaanshaha si ilmahaaga uu u helo waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xiriira marka ugu horeysa, markaa, wali aan go'aan sharci u dhammaan lana sugayo natiijada, degmadaada dusgi ama ururkaaga maaraynta waxaa ku waajib ah inay siiyaan ilmaha waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira kuwaa oon la isku diiddanayn (kuwa adiga iyo degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta labadiinuba aad oggoshihiin).

Shirka Arrin Xallinta

Xeerka 2365.1.8

Kulanka Arrin Xallinta

Markaad muddo 15 maalmood gudaheed aad ku hesho ogeysiiska cabashadaada habraac cadaaladeed leh, iyo kahor inta aaney bilaabmin dhageysigaaga habraac cadaaladeed leh, degmadaada dugsi iyo ururkaaga maaraynta waxaa ku waajib ah kulan la yeeshaan adiga iyo xubinta kale ee ay khuseyso ama ka mid ah Xubinaha Kooxda Barnaamijka Waxbarashada Shaqsiyaadka (IEP) kuwaas oo u leh aqoon dheeraad ah xaqiiqda lagu tilmaamay cabashada habraac cadaaladda leh. Kulanku:

- Waa in u ka mid noqodaa wakiilka degmaadada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin ee leh awood go'aan-garitaan uga wakiilka ahaan degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin; iyo
- Waa inuuna ku jirin looyar ay leedahay degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin dugsi haddii aanu adigana kula socon looyar mooyee.

Adiga iyo degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin ayaa go'aamin doona xubnaha ku lug leh kooxda IEP ee ka qaybgalaya kulanka xallinta arrimaha.

Ujeeddada kulanku waa inaad adigu kala hadasho cabashadaada hacsocdka cadaaladeed leh iyo xaqiiqooyinka ay ku salaysan tahay cabashadaadu, si degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin ay helaan fursad ay ku xalliyaan khilaafka.

Kulanka xallinta looma baahana haddii:

- Adiga iyo degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin aad qoraal ahaan ku heshiisaan inaad iska-dhaaftaan kulanka; ama

- Adiga iyo degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin oo ku heshiiya inaad isticmaashaan nidaamka dhexdhexaadinta, sida lagu sifeeyey hoosta cinwaanka Dhexdhexaadinta.

Muddada Xallinta

Haddii ayna degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin ay u xallin waayaan cabashada habraaca cadaaladeed leh si adigu aad ku qanacsantahay muddo gudaheed 30 maalmo taarikheed ee ay ku heleen cabashada habraaca cadaaladeed leh (muddada wakhtiga loogu talagalay nidaamka xallinta), dhageysiga habraaca cadaaladeed leh ayaa laga yaabaa inuu qabsoomo.

Muddada la qabtay ee ah 45–maalmo-taariikheed in lagu gaaro go'aanka kama danbeynta ah ee bilaabmi doonta dhicitaanka muddada xallinta 30–maalmood-taariikheed, iyada oo ay jiraan waxyaabo gaar ah oo ka reebban in lagu beego muddada la isku hagaajiyey ee muddada 30- maalmo-taariikheed xallinta, sida hoos ku qeexan oo kale.

Laga reebo markaad adiga iyo degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin labadiinuba aad ku heshiiseen iska-dhaafka nidaamka xallinta ama isticmaalka dhexdhexaadinta, ku guul dareysigaaga ka qeybqaadashada kulanka xallintu waxay dib u dhigi doontaa waqtiga loo qabtey nidaamka xallinta iyo dhageysiga habraaca cadaaladeed leh illaa aad oggolaaneyso inaad ka qeybqaadato kulanka.

Haddii kadib markay ay sameeyaan dedaal macquul ah oo u dadaalku diiwaan-gashan yahay, degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin ayna helinka qayb-qaadashadaad kulanka xallinta, degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin ayaa laga yaabaa, in dhammaadka muddada xallinta 30-ka maalmood-taariikheed, inay ka codsado sarkaalka dhageysiga inuu joojiyo cabashada habraaca cadaaladeed leh.

Diiwaangalinta dadaalladan oo kale waa in ay la socotaa qoraal sheegaya iskudayga degmadaaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin in lagu abaabulo goob iyo goor la isku raaco, kana midka yihiin:

- Diiwaan ku-qor xog faahfaahsan oo ku saabsan talefoonnada la wacay ama la isku dayey iyo natiijooyina wicitaannadaasi;
- Nuqullo ah waraaqihii lagu wada xiriirey ee adiga laguu soo diray iyo wixii jawaabo ee la helay; iyo
- Diiwaan qor xog faahfaahsan oo ah wixii booqashooyin gurigaaga ama goobta shaqadaada lagu tagay iyo natiijooyinka booqashooyinkaas.

Haddii u degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin u ku guuldareysato inuu qabto kulanka xallinta muddo ah 15 maalmood taariikheed gudahood oo ay ku heshay ogeysiiska cabashada habraaca cadaaladeed leh ama ku guuldareysato inay ka qeybqaato kulanka xallinta, waxaad weydiisan kartaa sarkaaka dhageysiga inuu ku amar ku bixiyo iney bilaabanto jadwalka muddada 45- maalmood-taariikheed kama dambeyska leh ee dhageysiga habraaca cadaaladeed leh.

Isku Hagaajinta 30ka-maalmood-Taarikheed ee Muddada Xallinta

Haddii adiga ama degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin aad qoraal ahaan iskugu raacdaan inaa iska dhaaftaan kulanka xallinta; markaa jadwalaka muddada u dhigan ee 45- maalmood-taariikheedka loo qabtay dhageysiga habraac cadaaladeed leh ayaa bilaabmeysa maalinta ku xigta.

Kadib marka ay bilaabanto dhexdhexaadintu ama shirka xallintu iyo ka hor dhammaadka 30 –maalmo-taariikheed ee muddada xallinta, haddii adiga iyo degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin aad ku heshiisan qoraal ahaan inuuna heshiis ahayn suurto gal, markaa jadwalka 45-maalmood-taariikheed ee kama dambeyska ee loo qabtay dhageysiga habraaca cadaaladeed leh ayaa bilaabmeysa maalinta ku xigta.

Haddii adiga iyo degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin aad ku heshiisaan inaad isticmaashaan nidaamka dhexdhexaadinta, dhammaadka 30 maalmo-taariikheed ee muddada xallinta, labada dhinacba waxay ku heshiin karan qoraal ahaan inay ku sii wataan dhexdhexaadinta illaa heshiis adag la isla gaarayo.

Hase yeeshe, haddii midkiin adiga ama degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin aad ka noqotaan nidaamka dhexdhexaadinta, markaa muddada u dhigan ee 45- maalmo-taariikheedka ah ee kama dambeyska ee loo qabtay dhageysiga habraaca cadaaladeed leh ayaa bilaabmeysa maalinta ku xigta.

Heshiiska arrimo-dajinta ee qoran

Haddii heshiis lagu gaaro kulanka xallinta , adiga iyo degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin waa inaad siku ogaataan heshiis sharcigu qabanayo oo ay:

- Aad saxeexdeen adiga iyo wakiilka degmadaaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin ee leh awood sharci qabta degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin.
- Lagu meel-marin karo maxkamad Gobol oo kasta u-qalanta awoodda (maxkamad Gobol oo awoodda u leh dhageysiga kiiska noocani oo kale ah) ama maxkamad degmo oo Mareykanka ka tirsan.

Muddada Dib-u-Eegidda Heshiiska

Haddii adiga iyo degmadaaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin aad gashaan heshiis ka yimid natiijo ahaan kulan wax lagu xallinayo, labada dhinacba (degmadaaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin) midkiinba ayaa kaga noqon kara heshiiska gudaheeda 3 maalmo meheradeed laga bilaabo wakhtiga labadiinuba adiga iyo egmadaaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin aad saxeexdeen heshiisa.

Dhageysiyada loo Qabto Cabashooyinka Habraaca Cadaaladeed leh

Dhageysi Nidaam Xuquuq Dhowris Eex-La’aan Ah

34 CFR §300.511

Marka kasta oo la xereeyo cabasho habraaca cadaaladeed leh, adiga ama degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ee khilaafka ku jiraa waa inaad lahaataan fursad dhageysi habraaca cadaalad eex-la’aan leh, sida lagu qeexay cabashada habraaca

cadaaladeed leh iyoqaybaha Nidaamka Xallinta. Waaxda Waxbarashada Vermont ayaa ka ma'uul ah inay kulansiiso dhageysiyada habraaca cadaaladeed leh.

Sarkaalka dhageysiga eex-la'aanta ah

Ugu yaraan, sarkaalka dhageysi:

- Waa inuuna ahayn shaqaale ka tirsan Waaxda Waxbarashada Vermont ama degmadaaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ama hay'ad ku dhex jirta waxbarashada ama daryeelka ilmaha. Hase yeeshe, qofku ma aha shaqaalaha haya'dda iyada oo ay sabab u tahay kaliya isaga ama iyada ayey haya'ddu siisay lacag inuu noqodo sarkaal dhageysi;
- Waa inuuna u yeelan xiise gaar oo shaqsiyeed ama shaqo oo u keeneysa iska-hor imaad cadaalinimada sarkaalka markay tahay dhageysiga;
- Waa inuu ahaadaa looyar sharciyesan;
- Waa inuu noqdaa qof culuun u leh oo fahansan xeerarka IDEA, iyo sharciyada Federaalka iyo kuwa Gobolka ee la xiriira IDEA, iyo ka tarjumadda sharci ee IDEA ee maxkamadaha Federaalka iyo kuwa Gobolkaba; iyo
- Waa inuu leeyahay culuunta iyo kartida u dhageysiyada ku wadayo, oo garta u ku qaado, iyada u hoggaansan oo ku habboon hab ku-dhaqanka qiyamka sharciga.

Waaxda Waxbarashada Vermont ayaa haysan doonta liis ay ku qoran yihiin dadka ku shaqeeyey ahaan saraakiisha dhageysi iyada oo ay la socdaan caddamha u-qalmitaannada arrimaha ee sarkaal kasta.

Mawduuca ku saabasan dhageysiga habraaca cadaaladda ah

Dhinaca (adiga ama degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin) codsada dhageysiga habraac cadaaladeed leh waa ineyna soo qaadin dhageysiga habraac cadaaladeed leh arrimaha aan ku jirin cabashada dhageysiga habraac cadaaladeed leh, illaa dhinacyadu ku heshiyaan mooyee.

Jadwalka Loogu Talagalay Dhageysiga

Adiga ama degmadaaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin waa inaad u codsataan dhageysi eex-la'aan ah cabashada habraaca cadaaladee leh, gudahooda labo sano laga bilaabo tariikhda adiga iyo degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin aad ogaateen ama ay ahayd inaad ogtihiin ariinta lagu sheegey cabashada.

Waxyaabaha ka Reebban Jadwalka

Jadwalka korka ku yaal kuma khuseeyo haddii adigu aad xereyn kari weyday cabashada habraac cadaaladeed leh sabab ah:

- Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin oo si gaar ah sawir aan jirin uga bixiyay inuu xalliyay dhibaatada ama arrinta lagu soo qaaday cabashadaada; ama
- Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin oo adiga kaa qariyey macluumaad looga baahnnaa inuu ku siiyo iyada oo hoos timaad sharciga IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada gaarka ah ee Vermont.

Qaabsocodyada Dhageysiga

Xeerka 2365.1.6.15

Guud Ahaan

Dhinac kasta oo ka mid ah dhageysiga habraac cadaaladda leh (oo ay ku jirto dhageysi la xiriira Qaabsocodyada edbintu) ayaa xaq u leh:

- Inuu weheliyo oo u la taliyo looyar iyo/ama dad u leh cilmi gooni ah ama tababbar la xiriira dhibaatooyinka carruurta naafonimada leh;
- Inay hor-keenaan caddayn iyo waji iskaga-hor-imaadka yeeshaan, oo su'aalo weydiiyaan, dalbadaanna inay markhaatiyo ka soo qayb galaan;
- Inay u diidaan hor-keenka caddayn kasta oo dhageysi oo aan la tusin dhinaca kale ugu yaraan shan maalmood meheradeed ka hor dhageysiga;
- Inay helaan diiwaan u qoran ama haddii ay doorbidayaan dhageysiga oo elektoroonik ah; oo ereyba-erey u diiwaan gashan yahay; iyo
- Inay helaan diiwaan u qoran ama haddii ay doorbidayaan wixii ah xaqiiqadii la ogaaday iyo go'aannadii oo elektoroonik ah.

Macluumaad Dheeraad ah oo Daah-uga-Qaadka ku Saabsan

Ugu yaraan shan maalmo-shaqo ka hor dhageysiga habraacaa cadaaladda leh, adiga iyo degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin waa inaad daaha iskaga qaaddaan dhammaan qiimeynta la dhameeyay illaa taariikhdaas iyo talooyinka ku saleysan qiimaynahaas adiga iyo degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin aad ku talo jirtaan inaad u isticmaashaan dhageysiga.

Sarkaalka dhageysiga ayaa iska hor-taagi kara dhinac kasta oo ka dhaca inay u hoggaansamaan waxyaabahan looga baahan yahay inay hor-keenaan dhageysiga qiimeynta waxa la xiriira ama kula talinta iyada oon laga helin oggolaansho dhinaca kale.

Xuquuqaha Waalid ee Dhageysiyada

Waa in lagu siiyaa xaqa in:

- Ilmahaagu joogo goobta;
- Loo furo dhageysiga dadweynaha, iyo
- Lagu siiyo waxa diiwaanka dhageysiga ku qoran, xaqiiqihii la helay iyo go'aammadii la soo gaaray iyaga oo wax lacag ah adigu kuugu kicin.

Go'aanka Sarkaalka Dhageysiga

Xeerka 2365.1.16(c)

Go'aanka sarkaal dhageysi haddii u ilmahaagu helay waxbarashada habboon ee lacag-la'aanta ah ee dawladda (FAPE) waa inay ku saleysnaato dhidbbo adag.

Dhageysiyada aad ku dacaweyneyso degmadu inay sameysey xadgudub qaabsocod, sarkaalka dhageysiga ayaa heli kara in ilmahaagu uun helin FAPE kaliya haddii qaabsocodku wax u dhiman yihiin:

- Ay faragelin ku samaysay xaqa ilmahaagu u leeyahay inuu helo waxbarasho dawli ah oo habboon (FAPE);
- Si daran u faragaliyey fursadaada inaad ka qayb qaadato nidaamka go'aan gaadhista ee khuseeya siinta ilmahaaga waxbarashada dawliga ah ee lacag-la'aanta ah (FAPE); ama
- Ay kuu horseedday waayitaan waxatar waxbarasho.

Waxaba kama horistaagayaan sarkaal caaafimaad inuu ku amro degmo dugsi ama urur maarayn tacliin inay u hoggaansamaan shuruudaha qaabsocodka ee hoos yimaad Xeerka 2365.1 illaa 2365.1.13.

Natiijooyinka iyo Go'aanka loogu talagalay Shacabka Guud

Waaxada Waxbarashada Vermont, ka dib markay tirtiraan wax kasta oo macluumaad qofka lagu garan karo, wa inay:

- Bixisaa natiijooyinka iyo go'aannada laga helay dhageysiga habraaca cadaaladeed leh, iyo
- Uga dhigtaa natiijooyinka iyo go'aannada inay dadweynuhu heli karaan.

Rafcaannada

Xeerka 2365.1.8

Kama-dambayn ahaanta g'aanka dhageysiga

Go'aan lagu gaaray dhageysi habraac cadaaladeedleh (oo ay ku jirto dhageysi la xiriira Qaabsocodyada edbinta) waa kama-dambays, laga reebo haddii dhinaca kale ee ku jira dhageysiga (adiga ama Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin) aad ku jirtaan rafacaan laga yaabaa dhageysiga ka qaadataan go'aanka idinka oo dacwo madaniya qaadanaya, sida lagu sifeeyey hoosta.

Jadwallada iyo Ku Habboonaanta Dhageysiyada iyo Dib-u-wegyada

Xeerka 2365.1.16 (a) & (b)

Waaxda Waxbarashada Vermont waa inay hubisaa iyada oon ka dambayn 45 maalmo taariikheed kadib markay dhacdo 30-maalmo-taariikheed ee muddada loogu talagalay shirarka xallinta ama sida lagu qeexay hoosteeda cinwaanka Isku Hagaajinta 30ka-maalmood-Taarikheed ee Muddada Xallinta, iyada oon ka dambayn 45-maalmo taariikheed kadib markay dhacdo muddada wakhtiga xallinta la isku-hagaajiyay:

- Go'aan kama-dambeys oo lagu gaaro dhageysiga; iyo
- Nuqul ah go'aanka oo loogu diro boosta dhinac kasta.
- Sarkaalka dhageysiga ayaa laga yaabaa inuu siiyo u dheereymo gaar ah oo ka baxsan wakhtiga 45-maalmood-taariikheed ee wakhtiga muddada lagu sifeeyey kor sida ay codsadaan labada dhinac midkood, haddii:
    - Horumarka waxabarashada ama fayoobida ilmuhu ayna qirinqiir ku galeynin soo daaha;

- Dhinac aan markaa haysan wakhti ku filan oo ay ugu soo diyaar garoobaan ama ku dhiibtaan mowqafkooda dhinac marka la joogo dhageysiga iyada oo la raacayo shuruudaha habraaca cadaaladeed; iyo
- U baahnida daahint ayaa ka weyn lacag kasta ama cawwqiyada saameynta leh ee ay ugu badan tahay u dhinac ku waxyeeloobo haddii ay soo daahu dhaco.

Dhageysi kasta waa in lagu qabtaa waqti iyo goob idinku habboon si macquul ah adiga iyo ilmahaaga.

Dacwo Madani ah

Xeerka 2365.1.9

Guud Ahaan

Haddii dhinac kastaa (adiga ama degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin) oo ku raacsaneyn natiijooyinka iyo go'aanka ka soo-baxa dhageysiga habraac cadaaladeed leh (marka lagu daro qaabsocodyada la xiriira edbinta) waxay leeyihiin xaq lagu keeni karo dacwada madaniga marka loo eego mawduuca lagaga hadlayo dhageysiga habraac cadaaladeed leh.

Ficilka waxa laga yaaba la keeno maxkamad Gobol oo u-qalanta awood sharci hoos-imaad (maxkamad Gobol oo awoodda u leh dhageysiga kiiska noocani oo kale ah) ama maxkamad degmo oo Mareykan iyada oon la eegin qaddarka la isku haysto.

Xaddidka Wakhti

Dhinaca (adiga ama degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin) ee keenaya ficilka ayaa haysta 90 maalmo taariikh laga bilaabo taariikhda sarkaalka dhageysigu u xereynayo ficilka madaniga ah.

Qaabsocodyada Dheeraadka ah

Ficil madani kasta, maxkamadda ayaa:

- Hesha diiwaannada iyo qaabsocodyada maamuleed;
- Dhageysata caddaymaha dheeradka ah markaad weydiisato ama degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ay codsadaan; iyo
- Ku saleysa go'aankeeda sida caddaymahu qaalib u yihiin oo waxay bixisaa u-xukumaadda maxkamaddu u garato inay ku habboon tahay.

Maxkamadaha degmada awood hoos-imaadkooda

Maxkamadaha degmo ee Mareykanka ayaa awoodda u leh inay xukumaan dacwooyinka la keeno iyaga oo hoos yimaad IDEA iyo Xeerarka waxbarashada gaarka ah ee vermont iyada oon loo eegin qaddarka la isku khilaafayo.

Micneynta Xeerka

Ma jiraan wax ku jira IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont ayaa xakameynaya ama xaddidaya xuquuqaha, qaabsocodyada, iyo sixitaannada la heli karo ee hoos timaad dastuurka Mareykanka, Sharcigii 1990 ee dadka mareykanka ah ee leh

Naafanamida, Cinwaanka V ee sharciga Dhaqancelinta ee 1973 (Qaybta 504), ama sharciyada kale Federaalka ah ee xuquuqdooda dhowraya carruurta naafanimada leh, hase yeeshe , kahor xereynta dacwad madani ah oo hoos timaad sharciyadan oo raadineyso caawimo waliba lagu helo karo hoostooda IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont, qaabsocodka habraac cadaaladeed leh ee lagu sifeeyey korka waa in la dhammeys-tiraa sida looga baahan yahay haddii dhinacu xereeyo ficilka hoos Yimaad IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont.

Tan micnaheedu waa adigu in laga yaabaa inaad haystado sixitaanno hoos yimaad sharciyada kale ee iska dul baxa marka loo eego sharciga hoos yimaad IDEA, laakiin guud ahaan, si aad caawimo aad uga heshid hoosta sharciyadan, waa inaad marka hore isticmaashaa sixitaannada maamuleed ee laga heli karo hoosteeda IDEA (tus., cabashada habraac cadaaladeed leh, kulanka xallinta, qaabsocodyada dhageysiga habraac cadaaladeed ee eex-la'aanta leh kahor si toos ah intaadan u tagin maxkamadda.

Ajuurada) Qareenka

Xeerka 2365.1.10

Guud Ahaan

Wixii kasta ee ah tallaabo sharci ama qaabsocod sharci ee la fulinayo ee hoos yimaad IDEA, iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont, go'aankeeda, maxkamadda markay tahay, ayaa dhici karta inay si macquul ah u xukunto lacagta ajuurada qareenka iyada qayb ka mid ah kharashka kaa baxay adiga.

Wixii kasta ee ah tallaabo sharci ama qaabsocod sharci ee la fulinayo ee hoos yimaadda IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont, maxkamadda, go'aankeeda ayaa dhici karta inay ugu xukunto si macquul leh lacagta qareenka iyada oo ah qayb ka mid ah kharashka ka baxay Waxaada Waxbarashada Vermont ama degmada dugsi ma ururka maaraynta ee guuleystay, inuu bixiyo qareenkaagu, haddii u looyarku:

- xereeyey cabasho ama kiiska maxkamadda ee maxkamaddu ay u garato wax bilaa-yacni ah oo aan macquul ahayn, ama waxa aan sal lahayn, ama
- lagu sii wado dacwada kadib marka dacwadu si iska ay noqoto wax bilaa-yacni ah oo aan macquul ahayn, ama waxa aan sal lahayn, ama

Wixii kasta ee ah tallaabo sharci ama qaabsocod sharci ee la fulinayo ee hoos yimaadda IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont, maxkamadda, go'aankeeda ayaa dhici karta inay ugu xukunto si macquul leh ajuurada(lacagta) qareenka iyada oo ah qayb ka mid ah kharashka ka baxay Waxaada Waxbarashada Vermont ama degmada dugsi ama urur maarayn tacliin ee guuleystay, inaad bixiso adigu ama qareenkaagu, haddii u qareenku, haddii aad codsato dhageysi habraaca cadaaladeed leh ama hadhow kiiska maxkamadda la soo hordhigo ujeeddooyin aan habboonayn, oo ay ka midka yihiin:

- Dhibaatayn
- U horseed soo daah bilaa sabab ah, ama
- Kordhin bilaa sababa oo ah kharashka dacwada ama qaabsocodka sharci.

U Xukunka Ajuurada (fees)

Maxkamad ayaa u xukumi karta ajuurada looyarrda si macquul ah sida soo socota:

- Ajuuradu qwaa inay ku saleysnaataa sicirka ka jira beesha dacwadu ama dhageysigu ka dhacayo ee u dhiganta nooca iyo tayada adeegyada la bixiyey. Waxa gunno ah ma ku-dhufte (multiplier) loo isticmaalayo xisaabinta ajuurada loo xukumo.
- Ajuurada ayaan loo xukumeynin oo kharashyada la xiriira ayaa dib loogu soo celinayn dacwo ama qaabsocod sharci kasta oo hoos yimaad IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont adeegyada loogu hawlgalay kadib marka wax u fidin xallin oo qoran adiga lagu siiyey haddii:
    - U fidinta ayaa loo sameeyey isla wakhtiga lagu sheegey Xeerka 68 ee Xeerarka Federaalka ee Qaabsocoda Madaniga ah ama, markay tahay dhageysiga habraac cadaaladeed leh , ama dib u eegid heer-Gobaleed ah, wakhti kasta oo ka badan 10 maalmood taarikheed kahor inta aanay dacwadu bilaabmin;
    - U fidinta aan lagu aqbalin 10 maalmo taarikheed gudahooda; iyo
    - Maxkamadda ama sarkaalka dhageysiga maamuleed ayaa helay in waxtarka aad adigu heshay aanu ka wanaagsanayn wax-u-fidinta xallinta arrinta aad ku helayso.
    - In kasta oo xaddidyadani jiraan, waxa laguu xukumi karaa adiga ajuurada qareenka iyo kharashyada la xiriira haddii aad adigu guuleysato oo aad si cadaalad ahna aad garta ugu leedahay diidmada wax u fidinta xalka la raadinayo.
- Lacagaha qareenka la siiyo (ajuurada) ayaan loo xukumeyn arrimaha la xiriira kulan kasta kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiyeysan (IEP) illaa kulanka loo qabto natiijo ka timid qaabsocod maamuleed ama ficil maxkamadeed.
- Ajuurada ayaan loo xukumayn dhexdhexaadinta sida lagu hoos qeexay cinwaanka Dhexdhexaadinta.
    - Kulanka xallinta, sida lagu qeexay hoosta cinwaanka Kulanka xallinta, ayaan loo qaddarin inuu yahay kulan ku yimid natiijo ahaan maamul dhaygeysi ama ficil maxkamadeed, waxa kale oo aan loo qaddarinayn inuu yahay maamul dhageysi ama ficil maxkamadeed iyada oo ujeeddooyinku yihiin biximaha ajuurada looyaradan.
- Maxmakada ayaa laga yaabaa inay naaqusto, kolba sida ugu habboon, qaddarka ajuurada loo xukumo looyarka markay hoos timaad IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada gaarka ee Vermont, haddii ay maxkamadu garato in:
    - Adiga ama looyarkaagu, muddada ficilka ama qaabsocoda lagujiro, aad sabab la'aan u daahisaan Xallinta kama danbaysta ah ee khilaafka;
    - Qaddarka lacagta ajuurada ah ee looyarka ee sida kale awoodda loo siiyey in loo xukumo oo si aan macquul ahayn uga badata saamiga saacadeed ee beesha ka jirta ee adeegyada la midka ah oo ay ku fuliyaan looyaro si macquul xirfadahaas, macaamil wanagasan iyo waayo aragga u leh.

- Wakhtiga lagu qaatay iyo adeegyada sharci ee la bixiyey oo loo arko inay xad-dhaaf yihiin marka loo eego nooca ficilka ama qaabsocodka; ama
- Looyarka kaa wakiilka ah adiga oo aan aan siin degmadaaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin macluumaadkii habboonaa ee ogeysiiska codsiga habraac cadaaladeed leh sida lagu sifeeyey hoosta cinwaanka Cabashada Habraac Cadaaladeed leh.
    - Hase yeeshe, maxkamaddu ayaa laga yaabaa inayna naaqusin ajuurada haddiii maxkamaddu garato in Gobolka ama degmada dugsi ama ururkamaarayn tacliin ay si aan caqligal ahayn u daahiyeen xallinta ugu dambeyesa ee ficilka ama qaabsocodka ama ay jireen ku-xadgudub hoos yimaad xeerark dhowritaannada nidaameed ee ka midka ee ka midka ah IDEA iyo xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Vermont.

Qaabsocodyada marka Carruurta Naafanimada leh La Edbinayo

Awoodda Shaqaalaha Dugsi

Xeerka 4313.1

U Go'aaminta Kees-ka-Kees

Shaqaalaha dugsi ayaa dhici karta inay tix-galiyaan xaalado kasta oo gaarka ah, iyada oo mid kasta gaar ahaanteed loo eegayo, in beddel meeleyn, lagu sameeyey iyada oo la lug heleysa shurruudaha soo socda ee la xiriira edbinta, u ku habboon yahay ilmaha naafonimada leh oo ku xadgudba Xeerka Anshaxa Ardayga ee dugsi..

Awoodda Guud

Ilaa heerka ay iyagu ku qaadayaan ficilkan oo kale waliba carruurta aan lahayn naafanimada, shaqaalaha dugsi waxa laga yaabaa, iyada oon wax badnayn 10 maalmo dugsi oo isku daba xiga, uga kaxeeyaan ilmo qaba naafanimo oo ku xadgudbay anshaxa ardayga iyada oo laga kaxeeyo meeleynta isaga ama iyadu xaadikan joogaan oo lagu meeleeyo goob waxbarasho oo ka duwan oo ku habboon, ku meelgaarna ah (oo ay tahay inay u garato barnaamijaka waxbarashada ilmaha ee shaqsiyeysan (IEP), ama goob kale, ama ka hakin. Shaqaalaha dugsi ayaa dhici karta waliba in u ku soo rogaan ka kaxaymo dugsi dheeraad ilmah oo aan ka badnayn 10 maalmo dugsi oo isku dabaxiga ee dhacdooyinka ka gaarka ee anshax xumada, illaa inta ka kaxay-mahaasi ayna ahayn meeleyn beddel (fiiri Beddelka Meeleynta Sabab Ka-Kaxaymo Edbin ee qeexitaankeeda, ku taal hoosta).

Marka ilmaha qaba naafanimada la kaxeeyo isaga ama iyada ku meeleyntooda hadda jirta wadar ahaan toban 10 maalmo dugsi hal sano dugsi isku mid ah, degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin waa inay, muddada maalmo kasta oo ku xigta ee ka kaxaynta sannad dugsi, waa inay bixisaa adeegyo illaa xadka laga rabo ee hoosta ku qoran cinwaan-hoosaadka Adeegyada.

Awoodda Dheeraadka ah

Haddii anshaxa ardayga xadgudubka galay aanay ahayn astaanta naafanimada ilmahaaga (fiiri Astaanta Go'aaminta, hoosta) iyada oo la beddelayo meelaynta edbinta oo ka badan 10 oo ah maalmaha dugsiga ah oo isku daba-xiga, shaqaalaha dugsi waxay ilmahaas ku qaadi karaan Qaabsocodyada edbina ilmaha naafonimada leh sida loogu sameeyo kuwo la mid ah iyo wakhti ahaan inta lagu sameeyo intey le'eg tahay ardayda aan naafanimada lahayn, marka laga reebo inuu dugsigaasi siiyo adeegyada hoos lagu sifeeyey ee hoos-yimaadda Adeegyada.

Kooxda IEP-ga ilmahaaga ayaa go'aamiya goobta waxbarasho ku-meelgaarka ah ee ka duwan ee loogu talagalay adeegyadan oo kale.

Adeegyada

Adeegyada ay tahay in la siiyo ilmaha naafonimada leh ee laga kaxeeyey goobta ilmuhu ku meeleeysan yahay xaadirkan ayaa dhici karta in lagu siiyo goob waxbarasho oo ka duwan oo ku meel-gaar ah.

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ayaa kaliya waxa laga rabaa in u bixiyo adeegyo ilmo leh naafonimo oo laga kaxeeyey goobta meeleeynta hadda isagu ama iyadu ku jiraan illaa toban (10) maalmood ama wax ka yar sannad dugsiyeedkaa, haddii ay ay siiso adeegyo ilmaha aan lahayn naafanimada ee sidaas oo kale looga kaxeeyo.

Ilmaha leh naafanimada ee laga kaxeeyo goobta meeleeynta ee ilmuhu hadda u ku jiro illaa in ka badan 10 maalmo dugsi waa in:

- U ku sii wataa helitaanka adeegyada waxbarashada, sidii karti loogu siin lahaa ilmaha in u ku sii wato ka qayb-qaadashada minhajka waxbarashada, in kasta oo ay goob kale, iyo in u horay ugu maro sidii uu ula kulmi lahaa hadafyada loogu dajiyey IEP-ga ilmaha, iyo
- Helista, markasta oo loo qaato inay habboon tahay, qiimayn anshaxeed oo shaqaynaysa iyo adeegyo wax-ka-qabasho anshaxeed iyo beddelaadooda oo loogu talagalay siday wax uga tari lahaayen xadgudbka anshax si aanay mar kale u dhicin.

Kadib marka ilmaha leh naafanimada laga kaxeeyo meeleynta hadda u isaga ama iyada ku jiro/jirto illaa 10 maalood dugsi isla sannad dugsiyeedkaas, iyo haddii ka kaxaynta hadda jirtaa tahay illaa 10 maalood dugsi oo isku daba-xigta ama ka yar tahay, iyo haddii kakaxayntu aan loo garan inay tahay beddel meeleyn (fiiri qeexitaanka hoosta), markaa shaqaalaha dugsi, iyaga oo la tashanaya ugu yaraan hal macallimiinta wax u dhigta ilmahaaga, ayey go'aaminayaan xadka illaa inta loo baahan yahay adeeyada sidii ilmahaaga karti loogu siin lahaa inuu sii wato ka qayb-qaadahsada manhajka waxbarashada guud, in kasta oo goob kale, iyo sidii horay loogu mari lahaa la kulanka himilooyinka loo dajieyey IEP-ga ilmahaaga.

Haddii ka kaxayntu tahay beddel meeleeyn, (fiiri qeexitaanka hoosta), kooxda IEP-ga ilmaha ayaa go'aamin doona adeegyada habboon sidii awood loogu siin lahaa ilmaha in u ku sii wato ka qayb-qaadashada manhajka waxbarashada, in kasta oo ay goob kale, iyo in u horay ugu maro sidii uu ula kulmi lahaa hadafyada loo dajiyey IEP-ga ilmaha.

Astaanta Go'aaminta

10 maalmo dugsi gudahood ka dib go'aanka kasta oo beddelaya meeleeynta ee ilmaha naafanimada leh oo sababtu tahay xadgudub xeerka anshaxa ardayga (ayna ku jirin ka-kaxaynta 10 maalmo dugsi ah ee isku-dabaxiga ma wax ka yar oon ahayn ka beddel meeleyn), degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin, iyo adiga , iyo xubnaha Kooxda IEP arrinta ku lug leh (sida aad go'aamisay iyo degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin) waa inay dib u eegtaa dhammaan macluumaadka arrinta ku lug leh ee faylka ilmahaaga ku jira, oo ay ka midka yihiin IEP ilmaha, wax kasta oo macallinku arakay, iyo macluumaad kasta oo ku lug leh oo adigu aadbixisay si loo go'aamiyo:

- Haddii anshaxa arrinta lagu jiro sababteeda ay tahay, ama xiriir badan oo si toos ah, ugu lahayd naafinimada ilmaha; ama
- Haddii anshaxa arrintiisa lagu jiro ay si toos uga timid natiijo ahaan ka gaabinta degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin inay hirgaliso IEP-ga ilmahaaga.

Haddii degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin, adiga iyo xubnaha ku lug leh arrinta ee kooxda IEP ee ilmahaaga, aad gartaan in lala kulmay xaaladahaas, anshaxa waa in loo gartaa inay tahay wax ka yimid naafanimada ilmaha.

Haddii degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin, adiga ama Kooxda IEP ee ilmahaaga ee arrinta ku lug leh ay go'aamiyaan in anshaxu laga hadlayaa uu ahaa mid toos natiijadeedu uga timid ka gaabinta degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin inay meelmariso IEP-ga, degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin waa in tallaabo degdeg ah ka qaaddo sidii ay u xallin lahayd khaladdaadkaas.

Go'aaminta in anshaxu yahay wax ka yimid ama calaamad u ah naafonimada ilmaha.

Haddii degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin, adiga iyo xubnaha ku lug leh arrinta ee kooxda IEP ee ilmahaaga, aad go'aamisaan in anshaxu yahay wax ka yimid naafanimada ilmaha, Kooxda IEP waa inay ku kacaan modkoodaba inay:

- Bilaabaan inay sameeyaan qiimayn dhaqan hawleed, haddii aanay degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin qiimayn anshax oo shaqaynaysa kahor anshaxaa ku dambeeyey dhicitaanka beddelka meelaynta, iyo meelmarinta qorshaha dhaxalgalka anshaxa ee ilmahaaga; ama
- Haddii qorshe wax-ka-qabasho anshaxeed hore loo soo-saaray, dib-u-eeg qorshaha wax-ka-qabasho anshaxeed, oo u beddel sida loogu baahan yahay ah, si wax looga qabto anshaxa ilmaha.

Laga reebo sida lagu sifeeyey hoosteeda cinwaan hoosaadka xaaladaha Gaarka ah, degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin waa inay ku soo celisaa ilmaha meeleynta ilmaha laga saaray, haddii mooye adiga ama degmada dugsi ama ururka maarayn tacliin aad ku heshiisaan inay meelayntu tahay qayb ka mid ah beddelka qorshaha wax-ka-qabasho anshaxeed.

Xaaladaha Gaarka ah

Haddii u anshaxa ilmuhu yahay mid muujinaya ilmaha naafonimadiisa iyo haddii kaleba, shaqaalaha dugsi ayaa u kaxayn kara ardayga oo geyn kara goob waxbarasho duwan oo ku meel-gaar ah (ay soo garteen kooxda IEP-ga ilmaha) illaa 45 maalmo dugsi, haddii u ilmuhu:

- U u sooqaato hub (fiiri qeexitaanka hoosta) dugsiga ama u ku haysto hub dugsiga, agagaaraha dugsi, ama meel howl dugsi lagu hayo oo hoos timaad maamulka Wakaaladda Waxbarashada Vermont ama degmo dugsi ama urur maarayn tacliin;
- Oo ogaan u haysta ama u isticmaala duroogo sharci-darro ah (fiiri qeexitaanka hoosta) ama iibiya ama isku daya in dadka ka iibiyo walax kontoroolan (fiiri qeexitaanka hoosta), marka u joogo dugsiga, agagaaraha dugsi, ama meel howl

dugsi lagu hayo oo hoos timaad maamulka Wakaaladda Waxbarashada Vermont ama degmo dugsi ama urur maarayn tacliin; ama

- U dhaawac halis ah jir uu uga geystay (fiiri qeexitaanka hoosta) qof kale mar la joogo dugsiga, agagaaraha dugsi, ama meel howl dugsi lagu hayo oo hoos timaad maamulka Wakaaladda Waxbarashada Vermont ama degmo dugsi ama urur maarayn tacliin.

Qeexmooyin

"Walaxda la kontoroolo" micnaheedu waa duroogo ama walaxa lagu aqoonsaday hoosteeda jadwallada I, II, III, IV, ama V ee ku jira Qaybta 202(c) ee Xeerka Walaxaha la Kontoroolo (21 U.S.C 812 (c)).

Duroogada sharci-darrada ah micnaheedu waa walax la kontorolo laakiin ayna ku jirin walax si sharci ah loo haysto ama loo isticmaalo iyada oo ay go'aamintaayaan xirfad-yaqaanno daryeel-caafimaad sharciyeysan ama si sharci ah loo haysto am loo isticmaalayo awood kasta oo kale oo hoos timaad qodobbada sharci kasta oo dawladda Federaalku leedahay.

"daawac daran oo jirka ah" ayaa leh micnaha la siieyey "Dhaawac daran oo jirka ah, hoos timaad baraagraafka (3) qayb-hoosaadka (h) ee qaybta 1365 cinwaanka 18, Xeerka Mareykanka.

"Hub" micnahiisu waa "hub khatar ah" sida lagu qeexay baraagraafka (2) ee qayb-hoosaadka (g) ee Qaybta 930 ee cinwaanka 18, Xeerka Mareykanka.

Wargalinta

Taariikhda ay go'aanka sameyso inay ka kaxeynta oo ah beddel meeleyn ah loogu talagalay ilmahaaga sabab ku xadgudub xeerka anshaxa ardayga awgeed, degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin waa inuu adiga kuu wargaliyaa go'aanka, oo ku siisaa adiga ogeysiis ah dhowritaannada nidaameed.

Beddelka Meeleynta Sababteedu Tahay Ka-Kaxaymo Edbin

Xeerka 4313.7

Ka kaxaynta ilmaha naafonimada leh goobta waxbarasho ee u ku meeleeysan yahayhadda ayaa ah beddel meeleeyn haddii:

- Ay ka-kaxayntu ka badan tahay toban 10 maalmo dugsi oo isku daba-xiga; ama
- Ilmaha lagu sameeyey ka-kaxaymo taxane ah oo muujinaya habdhaqan gaar ah sababta oo ah:
- Ka kaxaymaha taxanayaahsa ah oo marka la isku geeyo ka badan toban 10 maalmo dugsi gudaheeda hal sannad dugsiyeed;
- Anshaxa ilmaha oon inta ugu badan la mid ah anshaxii ilmaha ee dhacdooyin hore ee ku dambeeyey ka kaxaymo taxanayaal ah; ama,
- Sida arrimaha dheeraadka ee ay ka midka yihiin:
    - dhererka ka-kaxaymaha,

- Wadarta inta wakhtigu le'eg yahay ee ilmaha laga kaxeeye, iyo
- Isku-dhawaanshaha ka-kaxaynaha midba midka kale u dhow yahay, iyo
- Muujinta wax laga fahmi karo ka kaxaymaha ayaa ka dhigan beddel meeleeyn lagu gartay xaalad kasta gaarkeeda iyada oo ay u eegayaan degmadaada dugsi ma ururkaaga marayn tacliin iyo, haddii laga hor-yimaad, waxay noqoneysaa in dib-loo eego iyada oo la raacayo habraac cadaaladeed leh iyo habsocodyada garsoorka.

U Garashada Goobta

Xeerka 4313.2

Kooxda barnaamijka waxbarasha shaqsiyeysan (IEP) waa inay go'aamisaa goob ka duwan oo ku meelgaarka waxbarashada ee ka kaxaynta ah beddelka meeleynta, iyo ka kaxaynta ku hoos dhigan cinwaan-hoosadka Awooda Dheeraadka ah iyo Xaaladaha Gaarka Ah, ee korka ku yaal.

Racfaan

Xeerka 4313.3

Waxaad xerayn kartaa cabasho habraac cadaaladeed leh (korka fiiri) si aad u codsato dhageysi habraac cadaaladeed leh haddii isaga ama iyadu ay ku heshiin wayaan:

- Go'aan kasta oo ku lug leh meleynta hoosteeda lagu sameeyey xeerarkan edbinta; ama
- Astaanta go'aaminteeda lagu sifeeyey korka.

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin ayaa xereyn kara cabasho habraac cadaaladeed leh si ay u codsadaan dhageysi habraac cadaaladeed leh haddii ay iyagu aammninsan yihiin ku haynta ilmahaaga meeleynta hadda jirta inay aad suurtogal u tahay inay ku dambeyso inay u keento dhaawac gaara ilmaha ama kuwa kaleba.

Awoodda Sarkaalka Dhageysiga

Sarkaal dhageysi oo la kulma shuruudaha korka lagu sifeeyey cinwaanka hoostiisa Sarkaalka Dhageysiga Eex-la'aanta ah waa in u socodsiiya dhageysiga habraaca cadaaladeed leh oo u go'aan gaaraa. Sarkaalka dhageysga aya dhici karta:

- Inuu ku soo celiyo ilmaha qaba naafanimada meeleynta laga kexeeyey ilmaha, haddii sarkaal dhageysiu u go'aamiyo:
  - inay ka kaxayntu ahayd ku-xadgudub ah shuruudaha la sifeeyey hoostaaed cinwaanka Awoodda Shaqaalaha Dugsi, ama
  - in anshaxa ilmuhu yahay wax ka yimid ama calaamad u ah naafonimada ilmaha; ama
- Inuu amaro ka beddel meeleeynta ilmaha leh naafonimada oo u ku meeleeyo goob waxbarasho duwan oo ku meel-gaar ah oo ku habboon in aan ka badnayn 45 maalmo dugsi haddii sarkaalka dhageysi uu u garto in ku haynta meeleeynta hadda jirtaa ee ilmaha ay si aad ah natiijadeedu ku damabsyn doonto dhaawac ku yimaad ilmaha ama dadka kale.

Qaabsocodyada dhageysiga ayaa laga yaabaa in lagu celiyo mar kale, haddii degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin aamminsan tahay in ku celinta ilmaha ee meeleeyntii hore ay u badan tahay inay ku dambeyso dhaawac ku yimaad ilmaha ama dadka kale.

Dhageysiga Habraaca Cadaaladeed ee La Dedejiyey

Mar kasta oo u waalid ama degmo dugsi ama urur maarayn tacliin ay xereeyaan cabasho habraac cadaaladeed leh oo ay codsadaan dhageysigan oo kale, markaa waa in la qabtaa dhageysi la kulmya shuruudaha lagu sifeeyey hoosta cinwaanka Qaabsocodyada Cabashada Habraac cadaaladeed leh, Dhageysiyada loo Qabto Cabashooyinka Habraaca Cadaaladeed leh, laakiin ay tahay Waaxda Waxbarashada Vermont oo ah inay abaabusho , ahana inuu qabsoomo 20 maalmo dugsi gudahood laga bilaabo taariikhda dhageysiga la codsatay oo waajib ahna in natajiijadiisu noqoto go’aan in la gaaro gudahooda 10 maalmo dugsi ka dib dhageysiga.

Haddii adiga iyo degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin ku heshiisaan mooyee, iyada oo qoraal ah, inaad iska dhaaftaan kulanka ama inaad ku heshiisaan isticmaalaka dhexdhexaadinta , waa in kulan arrimaha xalliya lagu gaaraa gudahooda toddoba maalmo taariikheed laga bilaabo maalinta la helo ogeysiiska cabashada habraaca cadaaladeed leh.

Dhageysiga ayaa laga yaabaa in lagu dhaqaaqo haddiii arrinta la xaliyey mooyee, taas oo ay ku qanceen labada dhinacba gudaheeda 15 maalmo taarikheed laga bilaabo maalinta la helo cabashada habraaca cadaaladeed leh.

Dhinac ayaa laga yaaba inay rafcaan u qaataan dhageysi habraac cadaaladeed leh oo degdeg ah oo si la mid ah sidii ay ugu qaadan lahaayeen go'aammada kale ee dhageysiyada habraaca cadaaladeed leh (fiiri Rafcaannada, korka).

Meeleynta Muddada Rafcaannada

Xeerka 4313.4

Marka, sida lagu sifeeyey korka, adiga ama degmo dugsi ama urur maaryn tacliin aad xereyseen cabasho habraac cadaaladeed leh oo la xiriira arrimaha edbinta, ilmuhu waa inuu (haddii adiga iyo degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin aad heshiisaan si kale mooyee) ku ekaadaa goobta waxbarashada duwan ee ku meelgaarka ah inta go’aanka sarkaalka dhageysiga laga sugayo, ama inta ay dhacayso wakhtiga muddada ka kaxaynta sida xeerku yahay ee lagu sifeeyey hoosta cinwaanka Awoodda Shaqaalaha Dugsi, kolba midkii ku horreeyaba.

Dhowritaanbada loogu talagalayCarruurta aan Wali aan U-Qalmin Waxbarasahda Gaarka iyo Adeegyada la Xiriira

Xeerka 4313.5

Dhowritaannada Guud

Haddii ilmo aan loo go’aamin inuu u-qalmo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada kale ee la xiriira, oo u jabiyo xeerka anshaxa ardayga, laakiin degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn tacliin ay ogeyd (sida lagu go’aamieyey hoosta) ka hor intuuna anshaxa keenay ficilka edbinta uuna dhicin, in ilmaha ilmuhu yahay ilmo naafanimo leh,

markaa ilmuhu waa inuu laga yaabaa taageero ka dhigan karaa dhowritaannada lagu sifeeyey ogeysiiskan.

Ku Saleynta Ogaanshaha ee Arrimaha Edbinta

Degmo dugsi urur maarayn tacliin waa in loo aamminsanaadaa inay ogeyd in ilmuhu yahay ilmo qabo naafanimo, ka hor intaan anshaxa keenay ficilka edbintu uuna dhicin:

- Adiga oo u muujiyay welwel inuu ka hayo qoraal ahaan oo ilmuhu u baahan yahay waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xiriira, una muujiyey shaqaalah kormeer ama maamuleed ee hay'adda waxbarasho ee arrinta ku habboon, dugsiga, ama macallinka ilmaha;
- Adiga oo codsaday qiimayn la xiriirta u-qalmitaanka waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriia markay hoos timaad IDEA Xeerarka Waxbarashada gaarka ah ee Vermont; iyo
- Macallinka ilmahaaga, ama shaqaalaha kale ee shaqeeya degmadaada dugsi ama ururkaaga maaranyta tacliin ayaa ugu muujiyey si toos ah welwel gaar ah oo ku saabsan anshaxa isdaba joogga ah oo uu muujiyey ilmahaagu Maareeyaha degmadaada dugsi ama ururkaaga maaranyta tacliin ee waxbarashada gaarka ah, ama maamulitaanka kale ee shaqaalaha degmadaada dugsi ma maaranyta tacliin.

Degmadaada dugsi ama ururkaaga maaranyta tacliin loo qaadan maayo inay aqoon u lahayd arrintan oo kale haddii:

- Waalidka ilmaha u oggolaan waayo in la qiimeeyo ilmaha ama u diido adeegyada waxbarashada gaarka ah; ama
- Ilmaha la qiimeeyey oo loo gartay inuu yahay ilmo aan naafonimo aan lahayn markay hos timaad IDEA iyo Xeerraka waxbarashada Gaarka ah ee Vermont.

Xeerarka lagu dhaqmayo haddii ayna jirin wax lagu saleeyo in arrinta la ogaa

Haddii kahor intaan tallaabooyinka edbinta lagu qaadin ilmaha, degmo dugsi ama urur maaraynta tacliin ayna ogeyn in ilmahu yahay ilmo naafanimo leh, sida kor lagu soo sifeeyey ee hoos timaad cinwaanka Ku Saleynta Ogaanshaha ee Arrimaha iyo Waxa ka Reebban, ilmaha ayaa laga yaabaa in lagu qaado tallaabooyinka edbinta ee lagu qaado carruurta aan naafonimada aan lahayn ee ku dhaqaaqa anshaxyada kuwaas u dhigma.

Hase ahaatee, haddii la codsado in qiimayn lagu sameeyo ilmo muddada wakhtiga ilmuhu lagu qaadayo tallaabooyinka edbinta, qiimaynta waa in loo socodsiiyaa si dhakhso leh.

Illaa inta qiimayntu dhammaanayso, ilmahaagu wuxu sii joogi doonaa meelayn waxbarasho oo ay go'aamiyeen saraakiishadugsigu, oo ay ka mid noqon karaan ka hakin ama eryitaan aan lahayn adeegyo waxbarasho.

Haddii loo garto ilmaha inuu yahay ilmo naafanimo leh, iyada oo la qaddarimayo macluumaadka laga keenay qiimeynta ay sameysay degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin, iyo macluumaad aad adigu bixisay, ayaa degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin yihiin inay siiyaan ilmahaaga waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira iyada oo la raacayo IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee

Vermont oo ay ka midka yihii waxayaabaha looga baahan yahay edbinta ee korka lagu sifeeyey.

U Diritaanka iyo Fulinta Ficilka Sharci iyo Masu'uuliyiinta Maxkamadeed

Xeerka 4313.6

Waxba sharciyadan gudahooda:

- Kama manuucayaan in hay'adi uga warbixiyaahan damabi u galay ilmo qaba naafanimo mas'uuliyiinta arrinta ku habboon arrinta; ama
- Kama hor-istaagyaan fulinta sharciga iyo masuuliyiinta maxkamadeed inay meel-mariyaan masuuliyadahooda taasi oo la xiriira dhaqan-galinta sharciga federaalka ah iyo ta Gobolkaba dambiyada uu geysto ilmo naafanimo leh.

Gudbinta Diiwaannada

Haddii degmo dugsi ama urur maarayn tacliin ay ku warbixyaan inuu ilmo qaba naafanimo dambi galay. degmada dugsi ama ururka maaraynta tacliin:

- Waa inay hubisaa in la soo gudbiyey nuqullada diiwaannada waxbarashada gaarka ah iyo tallaabooyinkii diiwaannada edbinta ee ilmahaaga si ay u eegaan masuuliyiinta warbixinta dambiga ay haya'ddu u gudbisay, iyo
- Waxa laga yaabaa inay u gudbiyaan nuqullada waxbarashada gaarka ah iyo diwaansannada edbinta ee ilmahaaga oo kaliya illaa intay oggoshahay Sharciga Xuquuqaha Waxbarasho iyo Xog-dhowrka Qoyska (FERPA).

Shuruudaha Meeleynta Waalid ay ugu Meeleeyaan Ardayada Dugsiyada Madaxabannaan Iyada oo Dowladdu Kharashka Qabto

Shuruudaha Guud

Xeerka 2368.4

IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ee Vermont ugama baahna degmada dugsi ama ururka maarayn inay bixiyaan kharashka waxabarshada, oo ay ku jiraan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, ee ilmhaaga leh naafanimada ee ku jira dugsiga madaxabannaan haddii mooyaane aanay degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin lahayn waxbarasho dawli ah oo habboon oo lacag la'aan ah (FAPE) oo ilmahaagu helo oo aad doorato inaan ku meeleyso ilmagaaga dugsi madaxbannaan. Hase ahaatee, degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ee u dugsiga madaxabannaani ku yaal waa inuu ku daraa ilmaha dadkabaahidooda lagu hoos qaddarinayo IDEA iyo Xeerarka Waxbarashada Gaarka ee Vermont ee ku saabsan carruurta waalidintood ku hoos meeleeyeen dugsiyada madaxbannaan.

Lacag dib-ugu-celinta loogu talaagalay ku meeleynta dugsiga madaxbannaan

Haddii u ilmahaagu horay u helay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira iyada oo hoos timaad awoodda degmo dugsi ama urur maarayn, oo adigu aad ku go'aansatay inaad qorto ilmahaaga dugsi madaxbannaan oo ah dugsiga hoose, ama dugsi sare , iyada oon oggolaan ama soo gudbin degmadaada dugsi ama ururkaaga maarayn, maxkamad ama sarkaal dhageysi ayaa laga yaabaa inuu ku amro hay'adda inay kuu soo celiso adiga kharashkii qoritaanka dugsi, haddii:

- Ay maxkamad ama sarkaalka dhageysi ogaado ineyna hay'addu u diyaarin siinta waxbarasho dawli ah oo habboon oo lacag la'aan ah (FAPE) ilmahaaga wakhtiga iyada oo dhowreysa ka hor intaan la qorin, iyo
- In ku meeleynta dugsiga madaxabannaani mid habboon yahay.
    - Maxkamad ama sarkaal dhageysi ayaa u garan kara in meeleyntaadu tahay mid habboon, xitaa haddii meeleyntu la kulmin qiyamyada gobolka ee la xiriira waxbarashada ay bixyaan degmada dugsi ama ururrada maaraynta tacliin.

Xaddidka Lacag dib-ugu-celinta

Kharashka lacag dib-ugu-celinta sida lagu sifeeyey xubinta qoraalka ee korka ayaa waxa laga yaabaa in la yareeyo ama la diido , haddii:

- Barnaamijka Waxbarasho ee Shaqsiyesan (IEP) shirkiisii ugu dambeeyey ee aad ka qayb-gashay kahor inta aanad adigu ilmahaaga ka saarin dugsiga dowladda, adigu aadan la socodsiin Kooxda IEP-ga inaad diiddantahay meeleynta degmadaaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin soo jeedisay in ilmahaaga la

siiyo FAPE, oo ay ku jirto welwelka adigu aad ka qabto arrinta iyo ujeeddadaada ah inaad ilmahaaga qortid dugsi madaxbannaan iyada oo ay kharashka dawalddu qabto; ama

- Ugu yaraan 10 cisho oo ah maalmaha shaqada (marka lagu daro maalmaha ciidaha ah ee ku soo beegma maalin shaqo) kahor intaanad ilmahaaga ka saarin dugsiga dowladda, adigu aadan oon siin degmadaada dugsi ma ururu go'aaminta ogeysiis goran oo ku saabsan macluumaadkaas.
- Ka hor inta aanad ilmahaaga ka saarin dugsiga dowladda, degmadaada dugsi ama ururkaaga maaraynta tacliin ku siisay ogeysiis hore oo qoran, ujeeddadaaduna tahay inaad qiimeyso ilmahaaga (oo ay ku jirto kelmado sheegeya ujeeddada qiimeynta ku habboon ee macquul ah), laakiin adigu aadan ilmahaaga u u keenin in la qiimeeyo; ama
- Markay maxkamadi garato inay ficilladaadu ayna ahayn kuwo macquul ah.

Hase yeeshe, kharashka lacag dib-ugu-celinta;

- Waa inaan la yarayn ama loo diidin awgeed bixin la'aanta ogeysiis haddii:
    - Dugsigu kaa hor-istaagey adigu inaad bixiso ogeysiika;
    - Aadan helin ogeysiiska mas'uuliyaddaada inaad bixiso ogeysiiska korka lagu sifeeyey; ama
    - U hoggaansanaanta shuruudaha korka ay badan tahay inay ku dambeyso waxyeello jirka ilmahaaga ah; iyo
- Laga yaabo, go'aan maxkamadeed ama sarkaalka dhageysiga, waa inaan la yarayn ama la diiddin maadaama aad bixiin weydey ogeysiiska loo baahan yahay haddii:
    - Aadan akhriyi karin ama qori karin Ingiriisiga; ama
    - Iyada oo loo hoggansamayo shuruudda korka ay sida ugu badan ku dambayn doonto waxyeello shucuureed oo dara oo timaad ilmahaaga.